

Hubinta Cuntada & Nafaqada

Wrabixinta Saddex-biloodlaho Kooban ee Suganaanta Cunnada iyo Nafaqada: Diirad
Saarid Hore-u-Digidda ka dib Xilliga Guga 2012

Natiijooyinka Ugu Muhiumsan

Natijjooyinka Ugu Muhimman Tiyyoo lagu saleynayo daraasaddii bishii 6aad, 2012 la qabtay ee ku saabsaney odoroska xilliga *Gu'ga iyo* la socoshada xaaladda sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee bishiiba ma soo baxda, **Hay'adda FSNAU waxay saadaalinaysaa inay waxba iska beddeleyn tirada dadka ku jira ama sugar xaalad cunto xumi baahsan oo ah heer daran ama *Gurmad* qaybta labaad ee sannadkan. Saadaashani waxay ku xiran tahay sii socoshada xaaladda gargaarka binaadaminimo (cunto iyo lacag), tiradaas oo ahayd 3.4 malyuuun bilihii 1aad-4aad ee sannadkan. Saameynta gargaarka binaadaminimo waxay kobcisay helitaanka cuntada, mashaariicada badbaadada bulshada iyo dakhliiga heer goys kaasoo u sahlav iibsiga xoolo dhagaal ah iyo *Guud* ahaan koboca xaaladda nafago ee waddanka.**

Climate

Markets

Nutrition

Agriculture

Livestock

Civil Insecurity

Special Articles

Integrated Food Security Analysis

Ha yeesh ee, xaaladda sugnaanta cuntada way ka sii dari doontaa hab-nololeedyada deegaanada beero-xoolo dhaqatada Koonfurta inta badan roob yari ka jirto deegaanada roob-falatada awgeed; sababi doontana hoos-u-dhac wax-soo-saarka beeraha. Wax-soo-saarka liita ayaa laga filayaa gobollada roob-falatada ama adablahaa ee deegaanada ku caanka ah masagada, oo ay ka mid tahay Baay oo ah gobolka ugu wax-soo-saarka badan masagada oo inta badan soo saara saddex dalool laba wax-soo-saarka masagada dalka oo dhan. Wax-soo-saarkan hooseeyaa uma fiicna beeraleyda danyarta ah ee ku sugaran hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada ku tiirsan beero falashada ee Koonfurta (Baay, qaybo ka mid ah Jubrooyinka, Shabeeloo yinka, Bakool iyo Gedo), oo inta badan wax-soo-saarka Gu'ga ka hela keyd badar gaadhaya muddo 4-6 bilood. Wax-soo-saarka liita ayaa laga filayaa hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada ku caanka ah digirta ee gobollada dhaxe, roob yari iyo cayayaan awgood. Arrintani waxay saameyn ku leedahay sugnaanta cuntada heer goys ee hab-nololeedkan.

Wax kale oo dareen leh cunto xumi ka taagan hab-nololeedka ido/riyo dhaqatada Deexda ee gobollada Dhexe iyo Waqooyi Bari iyo qaybta gobollada Awdal iyo W. Galbeed ee Gacanka Cadmeed, roobabka oo liita awgood. Ha yeeshoo, xaaladda sugnaanta cuntada waxa la filayaa in ay sii ahaato mid kobcaysa inta badan hab-nololeedyada kale ee dalka, oo Muqdisho ay ku jirto. Haddaba, hoos-u-dhaca tirada dadka dhibaataysan ee qaybo ka mid hab-nololeedyada waxa dheelitiraya korodhka tirada dadka dhibaateysan ee ku sugaran hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada ee ku sugaran Koonfurta iyo Bartamaha.

Tixgelinta arrimaha saadaasha kor ku xusan, waxa aad u muhiima sii socoshada gargaarka binaadaminimo, gaar ahaan deegaanada ay ka jirto nafaqo darrida aadka u ba'an ee koonfurta Soomaaliya, oo la filayo inayan wax isbedel ahi ka dhicin. Waxa la filayaa in uu ka dhaco hagaag iyo koboc qaybta labaad ee sannadkan deegaanada Shabeellaha Hoose iyo dadweynaha ku sugaran Muqdisho. Waxa laga filayaa gobollada dhexe iyo waqooyiga in ay ahaato xalaadda nafaqada sida ay iminka tahay inta badan deegaannadan (**xaalad nafaqo ba'an ama daran**). Xaaladda nafaqo ee dadka barakacayaasha ah waxa la filayaa inay sii ahaato **xaalad Daran-Aaad u Daran** inta badan deegaanada ay ku sugaran yihii. Arrimaha keenaya heerka sarreeya ee nafaqo xumida hadda ka jirta dalka waxa ka mid ah caano yari jirta oo ay ugu wacan tahay xoolaha heer qoys oo yar oo ay abaarihii sababeen, cuduro ay keeneen biyaha wasakhda ah iyo la'aanta adeeqyada caafimaad iyo dhaganka soo jiireenka ah ee quiidin iyo darveel xumada dhallaanka.

Sidaa awqeed, malevaasha muhiimka ah ee muuiinaya saadaasha ku sii iiridda xaalad cunto xumi waxa ka mid ah:

- Odoroska hooseynta wax-soo-saarka beeraha deegaanada hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee Koonfurta
 - Hagaagidda xaaladeed inta badan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada oo loo aaneynayo qimaha xoolaha oo wanaagsan, korodhka tirada xoolaha la filanayo iyo baahida sare ee dhoofka xoolaha
 - Hagaaga iyo korodhka dhaqdhaqaqa hay'adaha gargaarka ee gobollada dhxey iyo koonfureed taas oo wax ka tari doonta liidashada wax-soo-saarka *Gu'ga*
 - Degenaanshaha qimaha firleyda iyo hoos-u-dhaca ama yaraanta kharashka quutul daruuriga oo ay sababtay qulqulka cuntada gargaarka bani'aadaminimo iyo dekedbacka Muqdisho oo shaqeyneyesa
 - Intaa waxa dheer, hagaagga awoodda is-weydaarsiga badarka iyo xoolaha ama maalin goosiga oo ay tahayna in uu gargaarku sii socdo

Taxane Xilliyeedka iyo Dhacdooyinka ugu Muhiimsan ee Soomaaliya

Hagaa Dry Season			Deyr Rains			Jilaal Dry Season			Gu Rains		
Jul 2011	Aug	Sept	Oct 2011	Nov	Dec	Jan 2012	Feb	Mar	Apr 2012	May	Jun
Macaluu ku raagtay Koonfurta; Dalag Xilligisii dhaafayoo wanaagsan oo reer-webiga Shabellaha Hoose gosteen; Roobab Deyr oo wanaagsan oo xilligoodii ka billowday waddanka intiisa badan	Roobab Deyr oo wanaagsan ooy heleen inta badan Koonfurta-Bartamaha; in kastoo sadaasha kuwa dalaga soosaasha iyo xoolo-dhaqatada ay wanaagsanatahy, Dhibaatada wey siir jiraysaa Koonfurta-Bartamaha	Inta badan Jilaal qabow ayaa ka dambeeyay roobabkii wax-ku-ool ahaa ee xilli roobaka yar; Dalag Xilligisii dhaafay oo wanaagsan ay gosteen gobollada Jubba, Sicirkabardaka oo taxane hoos u dhac ku socday	Waxaa la filayaa in Waxsoosaarka Guga ee beer-xoolo-dhaqatada koonfurta uu yaraado; Sicirkabardaka iyo xoolaha waa wanaagsaniyihin; Tirada dadka diinaatayayn ayay u badan tahay inaanay isbeddelin niska dambe ee 2012								

Odoroska wax-soo-saarka iyo saameynta uu ku leeyahay qiimayaasha

- Wax-soo-saarka liita ee xilliga *Gu'ga* waxa lagu sababeeyaa hooseynta wax-soo-saarka masagada ka baxda Koonfuurtu roob yari iyo cayayaan awgood. Ha yeeshi, rajada wax-soo-saarka oo inta badan ka soo baxda jiinka webiga ma xuma waraabka wibiga oo jira awgii. Sidaa awgeed, wax-soo-saarka badarka ee xilliga *Gu'ga* waxa la filayaa in uu noqdo mid u dhaw dhexdhexaad gobollada *Shabeel looyinka*, oo caadiyan soo saara qiyasahaan 55 boqolkiiba wax-soo-saarka *Guud* ee Koonfurta. Intaa wawa raaca, roobabka Xagaayadu oo keenaya fursado ah in dalag tabcashadu ka sii jirto gobollada Shabeellaha Hoose iyo Jubbooyinka. Wax-soo-saarka masago oo heer dhexdhexaad ah ayaa laga filayaa Gobollada Awdal iyo W. Galbeed bilaha 10aad-11aad, 2012, taas oo ay saadaashu muujinayso in ay *Karantu* tahay mid u dhaw xilli dhexdhexaad ah.
- Qiimaha firileyda ama badarku waxuu muujinayaa hoos-u-dhac sannadkan, kaas oo ina tusaya in meelaha qaar ay qiimaha badarku wax yar kor-u-kacay ama sidiisii uu ahaa bishii 5aad. Hoos-u-dhaca taxanaha qiimaha firileyda waxa sababay korodhka oolitaanka badarka Deyrtii 2011/12 iyo wax-soo-saarkii bilihi 3aad-4aad, 2012 iyo gargaarka socda awgood. Sida hadda ay yihii qiimaha firileyda waxay ina siinaysaa ama dusaysaa in hoos-u-dhaca qiimaha uu sii socon doono bisha 7aad oo ah marka gooshada badarka xilliga *Gu'ga* la billaabayo

Waxa la filayaa waxogaa horumar ah hab-nololeedyada xoolo dhaqatada ugu muhiimsan

- Xaaladaha daaqa iyo biyuhuba way wanaagsan yihii ama waa dhexdhexaad inta badan deegaannada xoolo dhaqatada ugu muhiimsan oo ay ka mid yihii Hawd, Sool, inta badan Nugaal iyo Cadduun, xoolo dhaqatada *Gudaha koonfureed* iyo bariga koonfureed. Hab-nololeedyadani waxay koobsadaan saddex daloolow laba dadka xoolo dhaqatada dalka. Dhalmada ishkinka (lo iyo geel) ayaa la filayaa laga bilaabo bisha 6aad, 2012, taas oo kordhin doonta helidda caanaha ka dib *Gu'ga*. Korodhka tirada ri'ya iyo idaha waxay billaabantay horaantii sannadkan, *Deyrtii* oo wanaagsaneyd awgeed. Qiimaha xoolaha ayaa kordhayay laga soo bilaabo bishii 12aad, 2011, inta badan suuqyada dalka; taas oo loo aanaeynayo cayilka xoolaha oo wanaagsan, iibsiga xoolo dhaqaal ah iyo sarreynata baahida loo qabo iibsiga xoolaha ee bisha *Ramdaan* (bilaha 7aad-8aad). Waxa la filayaa inay qiimaha xooluhu uu sii kordho xilliga *Xajka* ee bisha 10aad, 2012. Baahida loo qabo dhoofka xoolaha, sarreynata qiimaha xoolaha, hagaagga helitaanka caanaha iyo korodhka tirada xoolaha waxay yihii qodobada saameyn doona sugnaanta cuntada ee qoysaska hab-nololeedyada xoolo dhaqatada iyo beero-xoolo dhaqatada ku tiirsan xoolaha bilaha soo socda. Dhoofka xoolaha ee dekeda Berbera iyo Boosaaso afartii bilood ee hore ee sannadkan wawa uu ka sarreeya 42 boqolkiiba intii la dhoofiyey sannad ka hor isla muddadan oo kale.

Cunno helidda bulshada magaalo joogga ah

- Xaaladda sugnaanta cunnada magaaloooyinka ayaa soo haagaysay sannadkan taasoo o laga arkay hoos-u-dhaca qiimaha maciishadda iyo hagaagga mushqaayada tacab goosiga. Karash Nololmaalmeedka Ugu Yar (KNUY) ayaa ah mid aan isbedel sameyn deegaanada laga isticmaalo lacagta Soomaalilaan (SISH), laakiin hoos-u-dhaca ayaa laga dareemey gobollada kale celcelis ahaan 14 boqolkiiba bilaha 1aad-5aad 2012 iyo 25 boqolkiiba marka la barbardiyo sannad ka hor (bishii 5aad, 2011). Walxaha cunno ee Nololmaalmeedka Ugu Yar (NUY) ayaa hoos-u-dhacay laga soo bilaabo 82 boqolkiiba sannadkii hore illaa 72 boqolkiiba haatan gobollada dhexe iyo koonfureed. Haddaba, awoodda wax iibsi ee dadka mu nool magaaloooyinka ayaa soo roonaaday/hagaagay lixdii bilood ee ugu dambeeey. Kobocan/hagaaggan awoodda wax-iibsi waxa ugu wakan korodhka isusocodka cunnada wax-soo-saarkii wanaagsanaa awgeed, gargaarka bani'aadminimo iyo furnaanshaha dekedda Muqdisho oo kordhisay badeecadaha soo degeya. Intaa wawa dheer, fursadaha maal-galineed ee ka socda Muqdisho oo saameyn ku yeelatay mushqaayadda maalin goosiga. Sahankii daraasadeed ee Muqdisho laga qabtay bishii 4aad, 2012, waxa uu muujinayaa koboc ama hagaag wanaagsan oo laga arkay dhinaca cunno qaadashada iyo shaqo qorista reer magaalka iyo barakacayaasha dhexedooda marka loo eego sahankii la filiyay bishii 12aad, 2011. Sugnaanta cuntada ee dadka ku dhaqan magaaloooyinka dalka wawa inta badan saameeya qiimaha badeecadaha iyo xaaladda nabadjelyo taas oo saameysa hawlaha dhaqaale iyo ka gargaarka bani'aadminimo.


XAALADDA NAFAQADA

- Xaaladda nafaqada ee Soomaaliya waxa la filayaa in aan wax isbedel ahi ku dhicin laga billabo bisha 1aad, 2012; waxayna ku salaysan tahay qdobadan soo socda: taxanaha taariikhheed ee nafaqada; sugnaanta cuntada iyo xaaladda caafimaad. Isbeddelada waaweyn ee ka jira marxaladaha nafaqada ma aha mid ku habboon ama waafaqsan xaaladda nafaqo ee Soomaaliya marka lagu saleeyo taxanii sannadihi 2008-2011. Haddaba, xaaladaha nafaqo ee gobollada dhexe iyo waqooyi waxa loo maleynayaa inay ahaadaan kuwo *Daran-Ba'an*, kaas oo waafaqsan wakhtigan oo kale sannadka. Gobollada Koonfureed waxa la filayaa inay ku sii jiraan xaalad nafaqo ***Aad u Ba'an***, marka laga reebo gobolka Shabeellaha Hoose oo wax-soo-saarka caadi ah laga rajeynayo una horseeda hagaag xaaladda nafaqo (*Ba'an*). Xaaladaha nafaqo ee barakacayaasha (IDPs) waxa la filayaa in aan Isbedel ku dhicin siina ahaadaan *xaalado Ba'an-Aad u Ba'an*, marka laga reebo kuwa Hargeysa oo ku sugnaan doona mid *Daran*. Daraasaddii nafaqo ee laga fuliyey Muqdisho bilihi 4aad-6aad waxay muujisay xaalad *Ba'an*. Intaa wawa dheer, xaaladda nafaqo ee dadka Muqdisho ku dhaqan waxa la filayaa in ay ahaato mid *Daran* sida ay sheegtay daraasaddii bishii 4aad, 2012.


SECTOR HIGHLIGHTS

CIMILADA

Khariidadda 1: Bishii 4aad - Bishii 5aad 2012 NOAA Sadaasha Qiyaasta Roobabka (SQR) oo % Celceliska Mudda Dheer (CMDh)



Khariidadda 2: Tobanlihi 1aad ee Bisha 6aad, 2012 (SPOT) ku-kala Duwanaanshaha Tusaha Isbeddelka Daaqsinka La-joogteeyay (TIDL) iyo muddada dheer




Waxtarka Roobabka

Qiyaasta Dayax-gacmeedka ee roobka oo waafaqay xogta ka imanaya deegaannada, ayaa tilmaantay in roobabkii xilliga Guga uu daahay, Guud ahaan roobabkii da'ayna ay ka hooseeyeen sidii caadiga ahayd, ahaana kuwo kala googo'an bahsanaantiisa iyo muddada uu da'ayay. Bishii 5aad, oo ahayd mid muhiim u ah korriinka dalagga iyo soo baxa daaqa, waxtarka roobka ee Koonfurta iyo Bartamaha ayaa u dhxeyeyay fudeyd ilaa dhedhexaad una dhxeyeyeen waqtii dheer oo roob la'aan ah. Si kastaba ha ahaatee, dhulka xoolo-dhaqatada ee Waqooyiga ayaa helay roobab yara wanaagsan. Lixaadka iyo baaxadda roobabkii Guga 2012 ayaa ku kala duwan waddanka. **Waqqoyi-Galbeed:** Gobollada intooda badan waxay heleen roobab dhedhexaad ah ama xooggan (80-120 % ee Celceliska Muddada Dheer - CMD) iyo roobab ka hooseeya caadiga (40-60% ee CMD) ooy heleen qaybo ka mid ah gobollada Sool, Sanaag iyo Awdal (Khariidadda 1). **Waqqoyi-Bari:** Waxay heleen roobab u dhxeyeyaa fudeyd iyo dhedhexaad oo baahsanatiisuna caadi tahay marka laga reebo Xeebaha Deexda ee degmada Iskushuban oo ay roobabku liiteen. **Bartamaha:** Xeebaha Deexda, Digir Tacbatada iyo qaybo ka mid ah xoolo-dhaqatada Cadduunka ee gobollada dhexe ayaa helay roobab fudud oo bahsanaantoodu ay ahaayeen heer caadi ama wanaagsana. Roobab u dhxeyeyaa fudeyd iyo dhedhexaad ayaa ka da'ay dhulka xoolo-dhaqatada Hawdka ee Galgaduud intiisa kalesa waxay heleen roobab u dhxeyeyaa dhedhexaad ama fiican. **Koonfurta:** Gobollada intooda badan waxay heleen roobab u dhxeyeyaa fudeyd iyo dhedhexaad oo baahsanatooduna ka hooseeyso sidii caadiga ahayd. Balse waxaa taa duwan, Hiran (xoolo-dhaqatada) iyo waliba Baay iyo Bakool oo helay roobab u dhxeyeyaa fudeyd iyo dhedhexaad oo bahsanaantooduna tahay dhedhexaad.

Xaaladda Daaqsinka

Tusaha Isbeddelka Daaqsinka La-joogteeyay (TIDL) uu dayax-gacmeedku soo minguuriyay ayaa muujinaya daaqsin caadi ah inta badan deegaannada xoolo-dhaqatada. Waxaase taa ka duwan, dhul-beereed baaxad leh oo dalka ka mida ah ayaa muujinaya hoos u dhac doogganaansho ka dib markii uu soo maray xilli *Jiilaal* iyo Guud ahaan roobabkii Guga oo ka hooseeyay sidii caadiga ahayd. Hoos u dhac doogganaansho oo ba'an ayaa ka muuqata qaybo ballaaran oo Jubbadaa Hoose ah, dhulka xoolo-dhaqatada ee deexda ee Jubba iyo Shabeel/ada Hoose iyo meelo ka mid ah dhulka beer-xoolo-dhaqatada Baay iyo Shabeel/ada Hoose/Dhexe. Hoos u dhac doogganaansho u dhxeyeyaa heer hoose iyo dhexe ayaa ka muuqata gobollada Baay, Bakool, Gedo, Hiraan, Mudug iyo Galgaduud (Khariidadda 2).

Khariidadda 3: Kalfadhigii Sadaasha Cimilida - Bisha 6aad ilaa Bisha 8aad 2012 Sadaasha Roobabka



Sadaasha Cimilada ee Xilliga Xagaaga soo Socda (Bisha 6aad-Bisha 8aad 2012)

Kal-fadhiggi 31^{aad} ee Sadaasha Cimillada Bahweyn Geeska Afrika (29-30 Bishii 5aad 2012), kulankii IGAD Golaha Saadaasha Cimilada iyo Dhaqangelinta (IGSCD), Hayadaha Heer-qaran ee Darsa Hawada iyo Biyaha, Ururka Caalamiga ee Saadaasha-Hawada (UCS) iyo bah-wadaagta kale ee Geeska Afrika, ayaa Guud ahaan ku soo koobay in loo badinayo in roobabka Xagaaga (Bisha 7aad-Bisha 9aad 2012) ee ka da'a xeebaha gobollada Jubbooyinka iyo Shabeelloyinka ee koonfurta Soomaaliya ay noqon doonaan kuwo caadiga u dhow ama ka sarreyya. Xaalad caadi ah ayaa loo saadaalinaya xilliga dalka intiisa kale (Khariiradda 3). Waxay middani saamaynaysaa roobabkii Karanta ee ka billaabanyay Bisha 7aad Waqooyi Galbeed (gobollada W. Galbeed, Awdal iyo qaybo ka mid ah Togdheer iyo Sanaag) iyo dalka intiisa kale roob la'aanta ahaa.

KOONFURTA iyo BARTAMAHAA SOOMAALIYA: FATAHAADIHII GuGA 2012

Xilligii Gugan, koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waxaa ka dhacay fatahaado roobeed iyo kuwo webi horraantii bishii 5aad iyo dhammaadki bishii 4aad. Dhanka Koonfurta (Shabeellaha Hoose), ka dib markii ay dadku gooyeen daad celisyadii webiga ayuu webiga ku fatahay beero beernaa iyo kuwo laga tagay in kastoo aanay sidaa u badnayn. Sababaha ugu weyn ayaa ahaa webi goyn, daad celisyada oo jilcsanayaa iyo isku dayo biyaha webiga loogu leexsanayo dhul-beereedyada. Shabeellaha Dhexe, fatahaaddu waxay ahayd mid sida caadiga ah webigu sababay ka dib markii webigu goostay meel awalba go'ayd iyo daad celisyo jilcsanayaa. Gobollada Bartamaha daadad ba'an ayaa si aad ah u waxyelleeyay tuulada (Gosol) ee Gaalkacyo ee gobolka Mudug barakiciyayna tuuladii oo dhan baabi'iayna hantidii.

Gaar ahaan, tobankii maalmood ee ugu dambeeyey Bishii 4aad, isku day ay qaar ka mid ah beeralayda au isku dayeen inay biyo u leexsadaan dhul-beerooodkoodii uguna wacneyd heerarka biyaha webiga oo hooseeyay ayaa sababay fatahaadihii degmada Kurtunwaarray (tuulooyinka Bulo-Warbo, Aalafuto iyo Towfiiq) ee Shabeellaha Hoose. Waxay keentay, inuu baabi'iyo dalaggii taagnaa in kastoo aanu aad u badnayn (50-100ha oo sisin la tubay oo weli tiilay beeraha iyo weliba 100ha oo galley hore loo beeray ah), halka dhul aan beernayn oo lagu qiyasay 400ha ay biyihii fadhiisteen. Waxaa ku daris leh, dhowr waddo oo loo marayay inay go'een gaadiidkiina ka istaagay. In kastoo fatahaaddii ka dhacday Towfiiq uu ku koobnaa dadkii deegaanka ayaa dhibkii uu u geystay sisintii la tubay ee tiilay beeraha aad u yarayd.

Tobankii maalmeed ee hore ee Bishii 5aad daadad ba'an ayaa fariistay dhammaan tuulada Gosol (gobolka Mudug) sababtyna in tiro 900 oo ruux ay barakacaan xoolana ku dhintaan qabow daraadii ka dib markii cimilo dhaxan iyo qoyaan leh uu helay muddadii fatahaadda. Hay'ado wadajira (Qaramada Midoobay/Hay'adaha Caalamiga) ooy la socdaan masuuliyiintii deegaanka ayaa kormeer ku sameeyay fatahaada tobankii maalmeed ee dambe ee Bishii 5aad si loo cayimo baahida degdegga ah ee goobtaa¹. Tobankii maalmeed ee dhexe ee Bishii 5aad, fatahaad webi oo caadi ah ayaa ka dhacday Shabeellaha Dhexe, in ku dhow 8-10 kiloomitir bariga Jowhar. Waxaa fatahaaddani sii biisay qararka webiga oo jilcsanayaa. Waxaa ka dhalatay, dhulbeered ay leeyihiin ,084 oo qoys (400-500ha) ay ku beerten galley iyo digir inay waxyelleeyaan. Balse, isku daygii dadka deegaanka, ayaa dhammaan meelihii uu webiga ka jabiyyay ee furnaa ayaa xidhay billowgii fatahaadda, si aad ahna u yareeyay baabili dalagga (galley iyo digir). Marka laga reebo tuulada kallya ee Raqayle ee degmada Jowhar oo marar badan uu webiga ka jabiyyay, ayay la soo deristay dhibaatooyin la xiriira korriinka dalagga ka dib markii ay biyihii ku bateen. Si kastaba ha ahaatee, wax ka qabadkii meelaha webigu ka jabiyo ayaa weli socda. Isla muddadaa, daadad ayaa laga soo sheegay gobolka Baay (degmada Burhakaba) oo baabi'iayyadacallada togga Bohosha iyo hantidii magaalada (10-12 Guri iyo bakhaarro ganaci).

Waxay Shaxda hoose ina siinaysaa dhibaataadii daadadka ay u geysteen gobollada oo kooban.

Gobol/Degmo	Tuulooyinka ay waxyelleeyeen	Nooca fatahaadda	Waxyellellada Fatahaadda	Waqtiga
Shabeellaha Hoose (Kurtunwaarey)	Bulo-Warbo, Aalafuto, Towfiiq	Fatahaad webi oo dadku sababeen	Dad ma barakicin; Gaadiidkii oo ka istaagay waddooyinkii ku irmaanaa; Ku dhowaad 400ha oo dhulaan la beerin ah ayay biyihii faristeen; Baabii'n yar oo dhulki beernaa ah (50-100ha oo sisin la goostay ah iyo 100ha oo galley horey loo beeray ah); Biyihii ku haray dhul beeredka ayaa hadda ah dhibka ugu weyn.	Tobanlihii 3aad ee Bishii 4aad
Mudug (Galkacyo)	Gosol	Daadad roobaad	Daadadkii ugu halisasanaa oo tuuladoo dhami dulmaray; Dadkii tuuladoo dhami (150 qoys) ayaa barakacy balse cidi kuma dhiman; Dhimasho xoolaad (100 ari ah iyo lab0 dameer) oo dhaxanta ugu wacnayd.	Tobanlihii 1aad ee Bishii 5aad
Shabeellaha Dhexe (Jowhar)	Raqayle, Gashanle, Magay, Baqdaad, Xanooley, Towfiiq, Bardhere, Kulmis-yarrow, Maqdas, Jameeco, Barey	Fatahaad webi oo caadi ah	Tiradii dhulka la beertay oo yaraatay; Biyihii oo fadhiistay baabili'yayna beero qiyastii 400-500ha beernaa ama aan beernayn; 1,084 qoys beerahoodii oo baaba'ay.	Tobanlihii 2aad ee Bishii 5aad
Baay (Buurhakaba)	Magaalada Buurhakaba	Fatahaad roobeed	Guryo (10-12) iyo bakhaaro ganaci oo magaalada ayay qaadeen; Togga Bohosha labadiisii gebi wuu jabiyyay.	Tobanlihii 2aad ee Bishii 5aad

¹ Xog wadajireed Kormeerkii Degdegga ahaa ee Daadadka DRC/NRC/RI/COOPI/ UNHCR/WHO /UNOCHA/LA. 21/Bishii 5aad/2012

COLAADADA SOKEEYE

Xaaladaha colaaeed ee gobollada Koonfurta iyo kuwa dhexe ayaa sii socday ilaa iyo bishii 1aad ee 2012, kuwaasoo inta badan salka ku haya ismaandhaaf siyaasadeed. Saamaynta dagaalladan ayaa laga dheehday barakaca dad; carqaladyn ku timi hawlaha dhaqaale iyo hab-nololeedyada; hakad ku yimi ganacsiga iyo isu socodka badeecoyinka, iyo weliba xannibaadyo ku yimi hawlaha Gurmadka bani'aadminimo. Warar lagu kalsoon yahay oo ka yimi Gudaha dalka iyo xogo kaleba bilihi 4aad/5aad ayaa muujinaya dagaallo ku sii baahay qaybo ka mid ha gobollada koonfurta Soomaaliya. Gaar ahaan, colaaado u dhxeyeyaa Dowladda Federaalka Kumeel-gaarka (DFK), oo ay caawinayaan Ciidamada AMISOM, iyo maleeshiyada dowlad-ku-meel-gaar diidka (Alshabaab) ayaa ku baahay gobollka Shabeellada Hoose (Afaafka Afgooye iyo degmada Afgooye). Dowladda Kumeel-gaarka (DFK) iyo ciidamada dowladda Kenya ayaa sii xoojiyay Gulufkooda ay uga soo hor jeedaan maleeshiyaadka ka soo horjeeda DFK, ayagoo qabsaday dhowr meelood oo hor leh oo ay ka mid tahay Degmada Afmadow. Xaalado kacsan ayaa iyana ka jira gobollada Bay, Bakool, Gedo iyo Hiiraan ayadoo iska hor imaadyo goos goos ah ee u dhxeyeyaa qolyaha dagaallamaya ay dhacayaan, halka iska hor-imaadyo goos goos ah laga soo sheegay qaybo ka mid ah magaalada Muqdisho in kastoo horumar la taaban karo oo dhanka nabadgelyada ah ay ka jirtay magaalada tan iyo bishii 9aad ee 2011 ka dib markii ay DFK ay la wareegtay gacan ku hanya magaalada. Dhanka gobollada Waqooyi, xaalado aan xasilloonayn ayaa weli ka dhex aloosan dowladda Soomaalilaan iyo maleeshiyooyin ka soo horjeeda taageersan maamulka Khaatumo ee gobollada Sool/Togdheer. Waxyeellooyin kooban ayaa la soo sheegay. Wax nabadgelyo darro ah lagama soo sheegin dhulka miyiga xilliga xogtan la qoray.

Saamaynta Tooska ah iyo Taan-tooska Ahayn


Sida laga soo xigtay Hayadda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR), tiro lagu qiyasay 1.36 Malyuu oo qof ayaa ku barakacsan dalka Gudhiisa, ayaa isu celcelin le'eg 43,000 oo qof ay barakaceen bishiiba intii u dhaxaysan bilihi 1aad - 4aad ee 2012. In ku dhow saddex-meelood labo meel oo dadka shacabka barakacay ee xilligan ayaa loo aaneynayaan nabadgelyo xumo tasoo xigta dib u soo noqoshoo barakacayaal iyo qaxooti (Jaantuska 1). Tirada ugu badan ee barakacayaasha ayaa ka yimid dhulka ay dagaalladu halakeeyeen ee gobollada Koonfurta. Xogta La-Socodka Dhaqdhaqaqa Dadka (XLSDHD) ee bisha 4aad ayaa muujinaya qiyas 33,000 oo qof oo ka soo barakacay waddanka Gudhiisa ayado boqolkiiba 65 ka mid ah (21,000 oo qof) nabadgelyo darri awgeed gobollada Shabeellada Hoose, Jubbadha Hoose, Baay, Bakool. Sida laga soo xigtay Warsidahe Bani'aadminimo (May 2012) ee Xafiiska Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilسان Isku Xirkha Hawlaha Bani'aadminimo (UNOCHA), tiro lagu qiyasay 18,000 oo qof ayaa ka barakacay Afaafka Afgooye (Ceeleasha Biyaha iyo inta la xiirta) una barakacay Muqdisho intii u dhaxaysay 22 iyo 30 Bisha 5aad ka dib Guluf cusub oo colaaeed oo ay qaadeen DFK iyo AMISOM. Sidaasoo kale, collaadaha Soomaalilaan-Khaatumo ee gobolka Togdheer ayaa weli ku haya saameey heer hoose ah dhaqdhaqaqyada dadka iyo hawlaha ganacsi.

Hab-nololedyo, ayna ka mid yihii ganacsiga iyo hawlaha suuqyada ee dhulka dagaalladu aafeeyee, ayay colaaadhu saameeyeen. Tusaale ahaan, baandow maalintii soconaya oo taagnaa tan iyo bishii 2aad ee 2012 ayaaan saamayeeyey hab-nololeedyada dadka saboolka ah maadaama ay ku tiirsan yihii hawlmaalmeydyada, sida xamaalliga, hawlaha dhismo (kuuli) iyo hawlaha ganaci ee yar yar. Gobollka Gedo, hakad ku yimd isu socodka ganacsiga iyo fursad u helidda shaqo maalmeed ayaa u keenay dhibaato shacabka ku nool qeybo ka mid ah Luuq (Bashiir iyo Yerkud) iyo Baardheere (Faafaxdhun iyo Tarako). Dagaallo sii fiday ayaa si aad ah u saameeyay hawlaha ganaci iyo isu socodka dadka. Madaafic ku garaacistii Kismaayo ee dhaamaadkii bishii 5aad ayaa saamayeeyey dekadda Kismaayo oo shaqadeedu ay gabaabsi sii ahayd, taasoo o carqalaysay hawlihi ganaci ee gobollada Jubbooyinka. Arrintani ayaa waxa laga dheehdey sare u kac ku yimi qiimaha quutul daruuriga (USD 98-USD116) marka la bar bar dhigo gobollada kale ee Koonfurta (USD76-96, celcelis ahaan) iyo weliba hoos u dhac ku yimid suuq geynta xoolaha ayadoo ay dadku ka gabbanayaan canshur ay soo rogeen kooxaha dagaallamaya. Sidoo kale, ka ganacsiga xoolaha ee u dhxeyeyaa Burco iyo Buuhoodle ee gobollada Waqooyiga ayaa waxa xannibay coladda Soomaalilaan-Khaatumo.

Sida laga soo xigtay Hay'adda UNOCHA Soomaaliya, xaaladaha nabadgelyo iyo gaarsiinta bani'aadminimo ayaa ahaa kuwo ba'an gobollada Koonfurta-Bartamaha Soomaaliya, ayadoo ay maleeshiyooyinku ay hawloda dagaal ay ka sii wadeed Baydhaba, Beledweyne iyo Xuddur. Dhanga gobolka Shabeellada Dhexe, wararku waxay sheegayaan in boob loo geystey gargaar bani'aadminimo oo la rabay in la qaybiyo; sidoo kale hawlaha qaybinta cunnada gargaarka, hoyga iyo alaaboo kale ee Muqdisho ayaa waxa weli horaagan wakiillo-ku-sheeg ka dhex jira xerooyinka barakacayaasha.

Ayadoo ay jiraan qorshooyin ay DFK iyo AMISOM ku fidinayaan maamuulkooda gobollada Koonfurta-Bartamaha, colaaadaha ayaa u muuqda inay sii socon doonaan bilaha soo socda, ayadoo laga yaabo inay ku sii baahaan qeybo kale oo ka mid ah dhulka ay colaaadhu saameeyeen ee Koonfurta-Bartamaha. Xaaladahan ayaa waxay keeni doonaan barakac dad, carqalado ku yimaada hawlaha dhaqaale iyo xannibaadyo hawlaha bani'aadminimo oo sii socda mustaqbalka dhow. Hase yeeshay, arrimahan ayaa horseedi doonta gaarsiinta Gurmadka bani'aadminimo ee Koonfurta-Bartamaha oo hore u marta.

Jaantuska 1: Dhaqdhaqaqa Dadka (Bisha 1aad-Bisha 4aad 2012)



Source: UNHCR/IASC PMT reports

² UN-OCHA Xog-warranka Samafalka Bani'aadminimo Bishii 4aad & Bishii 5aad 2012

³ Lox-xogeedka Samafalka Bani'aadminimo ee Soomaaliya Bishii 4aad 2012

⁴ Xero Ilasheyayaasha ayaa ah kuwa isku magacaabay wakiillada barakcayaasha Gudaha dalkamuhuumna ma aha in la soo doortay iyaga

BEERAHA

Qodista

Xilliga Gu'gu waxa uu bilawday xilligiisii caadiga ahaa taas oo keentay in dhulka la qoday dalka oo dhan nqoto mid dhedhexaad ah marka laga reebo Hiiraan iyo deegaannada xeebta ee gobollada Shabeellaha Hoose iyo Jubbooyinka. Ha yeeshi, dhulka dalagyadu ka bexeen way ka yar tahay inta la qoday, sababta oo ah roobabka oo liitay khafiifna ahaa taas oo wehelisay roob la'aan muddo ah (30-35 cish) bilihii 5aad-6aad ee gobollada Baay, Bakool, Jubbooyinka, Hiiraan and Bartamaha. Waxa dalagyada sii wax yeeleeyay jiriqa iyo kabajaa ka dilaacay ama ku faafay hab-nololeedka beero-xolo dhahqata ee gobollada Baay, Bakool, Gedo and qaybo ka mid ah Jubbada Dhexe taas oo dhalisay in laba saddex jeer lagu celiyo abuurka. Waxyelo yar oo ay geysteen cayayaan (Malabiso, dhuunqabad, iwm) ayaa laga soo sheegay gobollada Shabeellooyinka, Hiiraan, Jubbada Hoose iyo deegaanka digirta laga tacbado kuwaas oo waxyeeleeyay dalagii soo awaal baxay. Dhinaca kale, deegaanada Dhesheekyada Jubbooyinka iyo dhulka waraabka diilka webiyada ee Shabeellooyinka, Gedo iyo Jubbada Dhexe (Saakow iyo Bu'aale), tacbashada dallagyadu waa dhedhexaad ama wax u dhaw, marka laga reebo qayta xeebta ee Shabeellaha Hoose iyo Jubbada Hoose, deegaanadaasi oo bilaabay jiilaal duug horaantii bishii 6aa ka hor curashada Xagaayada ee aakhirka bilaha 6aad-8aad. Haddaba, kolba sida ay ka noqoto Xagaayadu gobolladan, waxay wax tar u tahay koritaanka dalagyada iyo beerashada kaleba. Fatahaad, inkasta uu yar yahay, ayaa laga soo sheegay Kurtuwaarey (Shabeellaha Hoose) iyo Jowhar (Shabeellaha Dhexe) kaas oo wax buuran aan ku yeelanayn wax-soo-saarka dalagyada (*firi Xubinta Fatahaada*).

Odroska Wax-soo-saarka


Gobollada Koonfur iyo Bartamaha, koritaanka/bixitaanka dalagyadu waxay ku jiraan heerar kala duwan (fal-horaad illaa caaneeyo) taas oo ku xiran kala duwanaanshaha wakhtiyada la beeray. Sii socoshada roobabka illaa dhammaadka bisha 6aad waxay muhiim u tahay taabbo galka bixitaanka dalagyada. Ha yeeshi, saadaasha hore ee wax-soo-saarka firileyda gobollada Koonfurta iyo Bartamaha waxay sheegaysaa inuu ka hooseeyo inta caadiga ah. Deegaanada roob-falatada ee Jubbooyinka, Bartamaha iyo deegaanada caanka ku ah masagada waxa laga filayaa wax-soo-saarka hoose. Ha yeeshi, wax-soo-saarka galleyda iyo masagada ee Shabeellooyinka waxa laga yaabaa inay noqoto caadi ama wax u dhaw sababta oo ah haagagsanaanta agabyada waraabka. Dhinaca deegaanada Waqooyi Galbeed, beerashada dalagu waa dhedhexaad ama wax u dhaw, roobabka dhedhexaadka ah awgood. Ha yeeshi, wax-soo-saarka firileydu, gaar ahaan masagada/hadhuudhka, ee beero-xolo dhaqatada Waqooyi Galbeed waxay ku xiran tahay kolba siday noqdaan roobabka xilliga Karanta, xilligaas oo bilaamaya aakhirka bisha 7aad, 2012. Hay'adda Falaqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) iyo la hawl galayaasheeduba waxay fulin doonaan daraasad ku saabsan wax-soo-saarka beeraha wadanka oo dhan laga soo bilaabo 5-26 bisha 7aad, 2012.

Qiimaha Firileyda iyo Tacab Goosiga

Waxa jira kala duwanaan ama gedisnaan taxanaha qiimaha firileyda intii u dhexeysay bilaha 1aad - 5aad suuqyada wadanka oo dhan. Inta badan deegaanada soo saara firileyda, waxa laga soo sheegayaa inay jiraan hoos-u-dhac yar ama dhedhexaad ah oo ku yimid qiimah firileyda. Marka loo barbar dhigo bishii 12aad, 2011, qiimayaasha galleyda iyo masagada inta badan suuqyada koonfurta waxay muujiyeen hoos-u-dhac sida gobollada Shabeellooyinka (5-15%), Jubbooyinka (33-39%) iyo deegaanada masagada caanka ku ah (38-64%) bishii 5aad, 2012, taas oo heerka hoos-u-dhaca qiimaha firileyda ugu sareeya laga diiwaan geliyey gobolka Baay.

Tan waxa sabab u ah oolitaanka badarka suuqyada taas oo ku xiran wax-soo-saarkii fiicnaa ee xilligi Deyrtii 2011/12, wax-soo-saarkii bilihii 3aad-4aad iyo gargaarka jira. Ha yeeshi, laga soo bilaabo bisha 4aad, qiimaha firileyda waxay muujiyeen koror yar suuqyada Shabeellaha Hoose iyo Baay (5-15%), taas oo ay ugu wakan tahay, qoysaska keydka haysta oon jecleysan inay badarkooda suuqa geeyaan gargaarka jira awgeed, halka qoysaska danyarta ahi ay dhammeysteen keydkoodii badar ee Deyrtii bishii saddexaadba. Hoos-u-dhac yar ayaa sidoo kale laga soo sheegay gobollada Dhexe (3%), Waqooyi Bari (15%) iyo Waqooyi Galbeed (10%) isla xilligaas oo kale. Sannad ka hor, qiimaha galleyda waxa u si aad ah uga dhacay gobollada galleyda soo saara ee Shabeellooyinka (60-73%) iyo Jubbooyinka (30-65%). Taxane la mid ah oo hoos-u-dhaca qiimaha masagada ayaa laga sheegayaa gobollada caanka ku ah masagada ee Baay (74-88%), Bakool (73%), Gedo (55-80%) iyo Bartamaha (40%), halka hoos-u-dhac yar laga xusay Waqooyi Bari (10%). Waxa laga yaabaa in qiimaha firileydu in uu hoos-u-dhaco bilaha soo socda goosashads dalagyada xilliga Gu'ga iyo sii socoshada kaalmada bani'aadminimo (Jaantuska 2 iyo 3).

Jaantuska 2; Taxana Goboleedka Qiimaha Galleyda (Jubba and Shabelle)



U Istimmaal Bacrin Beer Bariis oo Wanaagsan. Jowhar, Shabeellaha Dhexe, FSNAU, 6aad, 2012

Curashada ama bilaabashada xilliga *Gu'ga* waxay kobcisay fursadaha tacab goosiga beeraha ee qoysaska dan-yarta ah, taas oo ay korodhay hawlaha beeraha ee inta badan deegaanada roob-falashada ee Koonfurta. Ha yeeshee, liidashadii roobabka *Gu'ga* ee bilaha 5aad iyo 6aad waxay keentay hoos-u-dhac ku yimid fursadihi tacab goosiga beeraha, marka laga reebo deegaanada laga soo saaro masagada ee Shabeelloyinka. Dhinaca kale, waxa si hufan u kobcay fursadaha tacab goosiga beeraha deegaanada webiga jiinkisa shaqooyinka jira awgeed (firileyda iyo geed midhood/khudaar) iyo waliba hawlaha lacag-ku-bixinta ee dayactirka keliyada Shabeellaha Hoose, Gedo (Beled Xaawa iyo Luuq) iyo Hiiraan (Jalalaqsi iyo Buule Burte) iyo waliba dayactirka waraha ee deegaanada beero-xoolo dhaqatada ee Wanlaweyn, Garbaharey, Jalalaqsi iyo Buulo Burte.

XOOLAHAA

Inta badan deegaannada xoolodhaqatada iyo beer-xoolodhaqatada, manaafacaadka laga helo xoolaha (cad iyo caano) way soo fiicnaadeen shantii bilood ee la soo dhaafay. Haynta arigu way kordhaysay ilaa xilligii Jilaalka. Sidoo kale, haynta geela iyo lo'duba waxa la filayaa inay kordhaan laga billaabo bisha 6aad 2012 iyo wixii ka dambeeya, suuqyda xoolaha intooda badan qii muhu wuu fiicnaaday tasoo ugu wacan tahay keenista xoolaha ee suuqa oo yaraatay lana xidhiidha abaaarihii horey loo soo maray, korodhka baahida iibka xoolaha, tarminta xoola iyo Jimirkha xoolaha oo fiicnaaday. Hase yeeshee, xaalada daaqua way ka hooseysaa sida caadiga ah waxana laga yaabaa inay saameyn hore ku yeelato hab-nooleedka Deexda ee Gobollada waqooyi Bari iyo Bartamaha iyo qaybo ka mid habnoleedyada *Guban*, Sool iyo Nugaal ee Gobollada waqooyi galbeed, meelo yar yar oo ka mid Caduunka iyo Digir Tacbatada ee gobollada dhexec. Haynta xooluhu weli kamay soo kaban abaaarihii hore ee saameynta ku yeeshay. Sidoo kale haynta lo'du waa ku yaaratay hab-nololeedka beer-xoolo dhaqatada ee Cadale iyo Aadan-yabaal ee gobolka Shabeellaha Dhexec iyo xoolodhaqatada gobollada Jubbooyinka iyo *Shabeellaha Hoose*.


Daaqa, Biyah iyo Guurgurka Xoolaha

Xilligii Deyrtii hore oo aad u fiicnaa marka lagu daro xilligan *Guuga*, daaqa xooluhu wuu fiicnaaday, ilaha biyahana sida berkadaaha, waraha iyo balliyada way buuxsameen ama qayb ahaanba buuxsameen. Hase yeeshee, waxa la filayaa in daaqa iyo biyuuhuba ay hore u dhamaadaan marka la eego habnoleedyada Deexda, iyo qaybo ka mid Cadduunka iyo Digir Tacbatada ee Gobollada dhexec, sabatoo ah roobkii *Guga* oo liita. Guurgurka caadiga oo aad u xoogan ayaa ka dhacay meelaha roobku si dhedhexaad ah uga da'een ee gobollada dhexec dhinaca habnoleedyada Hawdka iyo qaybo ka mid ah Caduunka iyo Digir acbatada, kasoo keeni kara in daaqa iyo biyuuhuba yaraadaan. Dhinaca gobollada waqooyi roobka *Guga* aad buu uga fiican yahay dhinaca Koonfurta iyo Bartamaha tasoo keentay in daaqaiyo biyuuhuba wanaagsanadaan. Hase yeeshee, xaalada daaqua way ka hooseysaa sida caadiga ah marka la eego hab-nololeedyada, *Guban*, *Gebi*, *Deexda* Iskushuban, Caluula iyo goobo yar yar oo ka mid ah Nugaal, Sool, Karkaar/Dharoor iyo *Golis* (Buuralayda) tassoo la xidhiidha roobka oo ka hooseeya sida caadiga ah. Wawa laga dayrinyaah hab-nololeedka *Guban* ee Gobollada Waqooyi galbeed iyo Awdal oo aan helin roobabkii xayska labadii sanadood ee la soo dhaafay, iyadoo la filayana roobka xiga ee xayskana bilaha soo socda ee Bisha 12aad 2012 ilaa Bisha 2aad 2013. Xilligan *Guga* waxaa la soo sheegay in Guurgurka xooluhu uu yahay caadi ama ku dhaw yahay caadiga deegaannda intooda badan. Gobollada Koonfurta, marka la eego kala duwanaanshaha muga roobabka daaqa iyo biyuuhuba waxay u dhaw yihiin sida caadiga sababtoo ah dertii hore ayaa saameyn fiican ku leh. Hase yeeshee, geedi ka yimid meelaha roob yarowgu ku dhacay ayaa laga soo sheegay meelaha roobka wanaagsan helay ee gobolka *Shabeellaha Hoose* iyo Jubbooyinka. Waxaa laga yaabaa in roobabka *Xagaaga* ee bilaha 7aad-8aad 2012 ay wanaajyaan daaqa dhinaca xeebta.

Kaaladda dhaqnaanshaha Xoolaha, Wax-soo-saarkooda iyo Tarankooda

Jimidhka xoolaha oo dhan ee gobollada Dhexec, koonfurta iyo qaybo ka mid ah gobollada Waqooyi wax ay yihiin meel u dhaxeysa dhedhexaad iyo fiican (heerka 3-4 iyo 1-5 ee ku qii maynta sawirka). Hase yeeshee, jimidhka arigawuu xumaad oo wuxuu ka hooseeyaa sida caadiga ah (Sawirka 2) gaaraahan hab-nololeedka *Guban* ee Gobollada Awdal iyo waqooyi galbeed. Taranka arigawaa dhedhexaad *Guud* ahaan dalka oo dhan. Qaybo ka mid gobollada waqooyi riyuuh waxay dhaleen xilligii Jilaalka ee la soo dhaafay. Waxaa la filayaa dhalitaanka geela iyo lo'du gobollada Waqooyi iyo Koonfurta xilliga *Xagaaga* (Bilaha 7aad-8aad). Hase yeeshee, geela intiisa badan ee gobollada Koonfurta/Gobollada dhexec iyo qaybo ka mid ah Gobollada waqooyi waxa la filayaa inuu dhalo xilliga Deyrtii ee soo socota ee 2012/2013. Dhalista geela oo yarayd xilligii la soo dhaafay ee Deyrtii, caanuhu waa ka yaraadeen gobollada oo dhan. Haseyeeshee, waxaa la filayaa caanaha geela iyo lo'da inay fiicnadaan Bilaha 7aad ilaa 12aad 2012. Taranka arigawaa dhedhexaad dhinaca gobollada Waqooyi iyo Koonfurta; laakiin wuu hooseeyaa marka la eego gobollada Dhexec. Taranka geelu wuxuu u dhaxeyyaa meel hoose iyo dhedhexaad dalka oo dhan, taranka lo'dana waa hooseeyaa marka loo eego gobollada Koonfurta.

Jaantuska 3; Taxana Goboleedka Qiimaha Mesegada (Baay, Hiiraan, Bakool, Gedo)



Daaqsin Wanaagsanaaday, Oogada Sool, Gobolka Bari, FSNAU, Bisha 6aad 2012


Gancsiga Xoolaha iyo Sicirkooda

Inta badan suuqyada wuu soo kordhayey sicirka xoolaha ilaa iyo Bishii 12aad 2011. Wuxuu kordhay sicirka arigadaabaxa ah ee gobollada Dhexe (26%), gobollada Waqooyigalbeed (29%) iyo goboladda Waqooyi Bari (17%). Dhinaca gobollada Konfurta Somaliya, neefka daaxaba sicirkisu wuxuu kordhay 9%, gobollada Shabeelle iyo Jubba iyo dhulka Masaggo Tacbatada (23%). Marka la barbardhigo sicirkii sanadkii hore wuu kordhay suuqyada oo dhan, gobollada Dhexe (15%), Waqooyi-bari (9%), Shabeelle(39%), Jubba (36%) iyo Masaggo Tacbatada (116%). Gaar ahaan: Hiraan (84%), Bakool(130%) iyo Bay (196%). Korodhka sicirka waxaa saameyn ku leh jimidhka xoolaha oo fiicnaaday iyo baahida loo qabo xoolaha xilliga Ramadaanka soo socda (Bilaha 7aad iyo 8aad 2012). Hase yeeshi, dhinaca Koonfurta waxaa raadreeb ku leh xoolaha oo yaraa oo ay sabab u ahayd aabaarihii la soo maray iyo hoos u dhaca xoolahii ay ku kaalmeyn jireen qoysaska ladani kuwa saboolka ah, sababtoo ah waxa soo saarka beeraha iyo gargaarka bini'aadminimo oo fiicnaa. Sicirka wuu u sarreeyaa dhinaca koonfurta marka loo eego dalka intiisa kale, sare ayuun u kacay marka loo eego sanadkii abaarta ee u dambeeyey (hoos u dhac 46% sannadka qaybtiiisa hore 2011). Isu dheelli tir sannadeedka wuxuu tilmaamaya koror waafiyi sicirka lo'da daabaxa ah marka loo eego sicirkii ugu hooseeyey ee xilligii abaarta ee sanadkii hore (sida Shabeellooyinka - 73 boqolkii, Jubban 16 boqolkii, halqa Masaggo Tacbatada uu yahay 106 boqolkii), taasoo o u sabab ah xoolaha oo aad cayilay, tiradooda oo yaraatay iyo iyadoo dib loo coodanayo ama loo dhaqayo.



Dhalma Riyaha oo Dhedhexaad ah, Hobyo, Koonfurta Mudug, FSNAU, Bisha 6aad 2012

Jaantuska 4: Isbeddella Qiimaha Riyaha Daabaxa (SoSh iyo SISh)



Sida lagu tibaaxay xogta rasmiga ah ee dekadaha Berbera iyo Boosaaso, qiyastii 1,480,201 neef oo neef ayaa laga dhoofiyey Soomaaliya intii u dhexeysay Bilihi 12aad 2011 iyo 5aad 2012. Waxaa 66 boqolkii laga dhoofiyey Dekedda Berbera, inta hartay oo ah 34 boqolbiibana waxaa laga dhoofiyey Dekedda Boosaaso. Marka la barbar dhigo muddadan oo kale sanad ka hor, dhoofka xooluhu wuxuu muujinayaa koror dhan 45 boqolkii wadarta labada dekadood. Awoodda Dekadda Berbera oo ballaaran, xoolaha dhoofka ah oo ka imaanayo Itoobiya oo kordhey iyo baahida dalabka Ramadaanka ee xoolaha ayaa ka mid ah qodobbada sababay kororka dhoofka xoolaha.


SUUQYADA IYO GANACSIGA

Bishii 1aad ilaa iyo Bishii 5aad 2012, SoSh wuu ka sii xoogaysanayay Doolarka Maraykanka ka dib markii Doolarka soo galaya ee ka imanaya hawlgallada samafalka iyo maalgashiga dadka dibadaha uu kordhay. Shilinka Soomaalilaand, ayaa isagu si tartiib ah u dhacay ka dib markiia uu kordhay isticmaalkiisa dhinaca dhaqaalahi iyo hoos u dhac xilliyeedka dhoofka xoolaha. Xoogsiga SoSh, ooy wehliyaan mucaawanada samafalka iyo kororka agabka kasoo degaya dekeda Muqdisho, ayaa horseeday hoos u dhaca sicirka agabka dibadda laga keeno ooy ka midka yihiin bariiska, sonkorta, shidaalka, saliidda cuntada iyo burka ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Deegaannada Waqooyiga, agabka la soo dejijo intooda badani ismayna beddelin ama wax yar bay hoos u dheceen. Isla muddadada, dhulka SoSh lagaga adeegto, sicir bararkii ayaa si aad ah hoos u dhacay Koonfurta iyo Bartamaha wax yarna waqooyiga. Balse, sicir bararka ayaa sare u kacay (3%) deegaanada SISh lagaga adeegto.

Isbeddella Sarriifka Lacagaha

2012ki, Shilinka Soomaaliga ayaa ka xoogeysanayay Doolarka Maraykanka, isagoo mahadiyay 12 boqolkii muddadii u dhexeysay Bishii 1aad iyo 5aad, Gobolka Banaadir ayaa ahaa 22,000 SoSh/Doolarkii Bishii 5aad 2012. Isbeddelka ayaa isku mid ahaa suuqyada gobollada ku adeegta SoSh. Waxay hantiyen ayaa ka weyn, una dhigma 25-33 boqolkii, marka la barbardhigo isla muddadaa ee sanaddii hore. Xogta ka imanaya dalka, ganacsatada ayaa la xiriirinaya xoogaysiga Shilinka, Dolarka Maraykanka ee soo gelaya suuqqa kana imanaya hay'adaha mucaawinada bixiya iyo dowladaha maalgalinaya dib u dhiska Soomaaliya. Shilinka Soomaalilaand, ayaa isna dhanka kale, si tartiib ah hoos u dhacay (15%), tan iyo Bishii 1aad 2012 suuqyada SISh lagaga adeegto. Waxaa inta badan lala xiriirinaya kororka adeegsiga Shilinka Soomaalilaand dhinaca dhaqaalahi iyo hoos u dhaca mugga xoolihii ka dhoofayay dekadda Berbera taas oo dhalisay in Doolarku ku yaraado suuqyada iyo lacagta cusub ee Soomaalilaand soo daabacday. Marka sanad loo eego, hoos u dhaca sarriifka lacagta ayaa u dhigma 8 boqolkii (Jaantuska 5).

Jaantuska 5: Heerka Sarriifka Lacagaha ee Billaha ah ee Gobollo Cayiman (SoSh iyo SISh ku Doolarka Maraykanka)




Isbeddelada Sicirka Badeecooyinka la soo Dejiyo

Sicirka badeecooyinka la soo dejiyo ee muhiimka ahi ee FSNAU iyo FEWS NET ay kormeeraan (bariis, sonkor, shidaal, saliidda la cuno iyo burka) ayaa si aad ah hoos u dhacay Koonfurta iyo Bartamaha marka loo eego sano hore (Bishii 5aad 2011). Gobolka Banaadir ayaa muuijyay hoos u dhicii ugu weynaa (26-40%) muddo sanad ah. Waxaa hoos u dhaca sicirrada agabkani sababay inta badan SoSh oo soo xoogaystay iyo sahayda ka imanaysa Dekedda Muqdisha oo korortay iyo weliba mucaawinada samafalka.

Waxaase ka duwan taa, dhulka Shilin Soomaaliga lagaga adeegto ee waqooyiga, sicirka agabka *la soo dejiyo* inteeda badani ayaa deggan ama in yar hoos u dhacay, waxaana ugu wakan qaar ka mid ah suuqyada la kormeero oo go'doon ah, ooy ka mid yihiin Iskushuban, Beyla iyo Caluula halkaasoo qimaha gaadiidka aad u qaalii ah. Intii u dhexeysay Bishii 1aad iyo 5aad 2012, Aaggashilin lagaga adeegto, sicirka bariiska, sokorta iyo burka ayaa in yar hoos u dhacay (5-9%) halka sicirka shidaalka uu si wax ku ool ah u kacay (33%) ka dib markii "shirkaddii Total" oo inta ugu badan keenta ay ka baxday deedna uu hoos u dhacay intii tillay suuqa. Sicirka saliidda cuntada ayaa degenaa muddadaasi. Marka la barbar dhigo sanadkii la soo dhaafay, kolka laga reebo shidaalka, sicirka agabka la soo dejiyo ayaa iska degganaa sbabtuna ahayd xaaladda shayda tillay oon isbeddelin (Jaantuska 6).

**Jaantuska 6: Sicirka agabka la soo Dejiyo oo la Barbar dhigay
Sarrifka Lacagaha, Banaadir**



Isbeddelada caalamiga ee agabkani ayaa muujinay sawir qasnaan.


Sicirka bariiska la dhoofiyoo ayaa Bishii 5aad kacay in yar (2%), sababtuna tahay sii iibsiga Ramadaanta ka hor oo kordhay. Sicirka sokorta ayaa dhacay seddexdii bilood ee u dambaysay, taasoo ka tarjumaysa tiro ku kororka suuqyada caalamka - Oolaanshaha ugu badani ee Indiya, Midowga Yurub iyo Tatlaand, iyo sahayda cusub ee ka imanaysa Baraasiil ee galaysa suuqyada. Saliid qayrii ee Abuu Dabey (oo ah halka ugu badan ee Soomaaliya ke hesho) ayaa in yar hoos u dhacay sanadkan balse deggan marka loo eego hal sano ka hor⁵. Saadaasha waxsoosaarka firida adduunka ee FAO ee 2012 ayaa tilmaameysa in bariiska oo kordhi doono, halka sarreenku uu hoos u dhici doono.

Wadarta *Guud* ee firida ka soo degta dekedaha Soomaaliya ee Muqdisha, Berbera iyo Boosaso bilihi 1aad ilaa 5aad ee 2012 ayaa 41 boqolkii ka sarreeyay sanadkii *la soo dhaafay*, gaarayna 395,457MT⁶. Kororka agabka *la soo dejiyo* ayaa dekadahoo dhami minguriyeen, halka kororka ugu weyni (120%) laga soo qoray Dekedda Muqdisha⁷. Ka ganacsiga firida ee xuduudaha ayaa iyana ka kala socday gobollada dariska la ah Kenya and Itoobiya, oo garay tiro *Guud* 2,510 MT oo masago iyo galley ah soona gashay waddanka muddadii u dhexeysay bishii 1aad-5aad 2012. Tiradan ayaa 25 boqolkii ka hooseeyay tiradhi lagu kala ganacsaday isla muddadaa ee sanadkii *la soo dhaafay*, uguna wacnayd firi weytadii aan caadiga ahayn ee waqtigaa.

Tusaha Sicirka Adeegta (TSA)

Muddadii u dhexeysay Bishii 1aad-5aad 2012, TSA, oo lagu qiyaso Isbeddelka ku dhaca qimaha Kharashka Ugu-yar ee Dambiisha (KhUD), ayaa muujinaya hoos u dhac (14%) dhammaan dhulka SoSh lagaga adeegto iyo koror yar (3%) dhammaan dhulka SISh lagaga adeegto. Heerarka sicir bararka ee sanadlaha ayaa si aad ah hoos u dhacay Bartamaha (24%) iyo Koonfurta (35%); Halka dhulka Waqooyiga ee SoSh lagaga adeegto uu hoos u dhac yar (5%) uu sameeyay. Heerarku wax yar (3%) ayay kordheen dhulka SISh lagaga adeegto. Isbeddelka ku dhacay sicirka masaggada, oo ah qaybta ugu weyn ee cuntada dambiisha, ayaa ah tusaha muhiimka ah marka la indho-indhaynayo sicir bararka (Jaantuska 7).

Jaantuska 7: Taxanaha Billaha ah ee Tusaha Sicirka Adeegta (TSA)



5 Sicir Tilmaamaha Toddobaadla Murban ee Abu Dabey FOB (Doolar/Barmiilkii), Maamulka Xogta Tamarta ee Midowga Marayanka, http://www.eia.doe.gov/dnav/pet/pet_pri_wco_k_w.htm

6 Tirada waxaa ku jira firida u dhiganta baastada, bariiska iyo burka. Bishii 5aad 2012 firida kaso degtay Muqdisho laguma darin

7 Isbarbar dhigga dekadda Muqdisho waa muddadii Bisha 1aad-4aad oo kaliya maadaama xogta Bishii 5aad aan weli lahayn. Waxay firida ka soo degtay dekaddan isugu jirtaa ganaci iyo samafalba.

HEERKA GURMADKA BANI'AADMINIMO BISHII 4AAD 2012 (SUGNAANTA CUNTADA IYO NAFAQADA)

Inkastoo nabadvigelyadu xuntahay, gaarista Koonfurta iyo Bartamaha (Baydhabo, Beledweyne, Xudur, Shabeellaha Dhexe iyo xeryaha barakacayaasha Muqdisho) ay adag tahay, Bilihii 1aad-4aad ayaa in lagu qiyaasay 3.4 malyuun oo dad ah helay gargaar dhammaan gobollada Soomaaliya. Waxay middani matalaysaa in 104% ku talgalkii 1.7 malyuun oo dad ah la caawiyay iyadoo la hormariyay sidii ay ku heli lahaayeen cunno iyo wixii kale ay ku badbaadi lahaayeen; 133% oo ku talagalka ahaana 1.1 malyuun la caawiyay iyadoo la siiyay mashaariic lagu maal gelinayo hab-nololeedyada. Cunto heliddu waxay isugu jirtay raashin toos la isu siinayay iyo iyadoo la hormariyay gaarista suuqa (foojarro cunto iyo samafal lacageed) iyadoo la siiyay dad lagu qiyaasay 848,000 oo ruux. Tiro lagu qiyaasay 1.6 malyuun oo qof oo kale ayaa ka faa'iiday hawlihii maalgalinta lagu hormarinayay hab-nololeedyada, waxaa ka mid ahaa in foojarro loo qaybiyay 33,313 oo qoys oo u dhiganta 34,623 oo saacadood oo u qalanta cagafyo beeraha fala; qaybin abuur (galley, masaggo iyo khudaar); ari lagu qiyaasay 840,000 ayaa laga tallaalay Peste des Petits Ruminants (PPR). Marka laga reebo gobollada Baay iyo Bakool uguna wacneeyd nabadvigelyo darrida iyo masuuliyiintii deegaanka oo diiday ololaha tallaalka, xarumo tallaal ayaa laga sameeyay xuduudaha u dhexxeeyaa gobollada Baay/Shabeellaha Hoose iyo Jubbada Dhexe. Waxaa ku darid mudan in dad lagu qiyaasay 73,280 oo ruux ay heleen weelal ay biyo ku shubtaan iyo xoolahooda oo loo tallaalay. Maalgelin lagu hagaajinayo waddooyinka, kanaalada webiga iyo waraha iyo weliba gabiyada webiga lagu xoojinayo ayaa lagu fuliyay iyadoo la bixiyay lacag caddaan ah, foojarro ama raashin-shaqo-ku baddalasho. In ka badan 984,000 qof oo reer magaal ah oo cunno yari ba'an ku sugnaa ayaa ka faa'iideystay hawlihii lagu xoojinayay badbaadada nolosha dadka. Waxaa intaa raaca, hawlgalladii nafaqada caruurtta ka yar shan sano iyo qoysaskooda iyadoo la siinayo cunto iyo foojarro, Gurmadka quudinta dugsiyada iyo cunto siinta qoysaska cunto yarida ku sugan iyo kuwa xubno ka mid ah qabaan xanuu muddo dheer ah. In lagu qiyaasay 77 boqolkiiba intii lagu talagalay ee caruurtta ka yar shan sano ee nafaqo la'aanta ahi ayaa lagu caawiyay waxyaalaha nafaqada soo celiya ee dhammaan gobollada Soomaaliya.

SUGNAANTA CUNTADA iyo HAB-NOLOLEEDYADA		NAFAQADA	
Maalgelinta lagu Taageerayo hab-nololeedyada Horumarinta Cunno Helidda Xoojinta Kaabayaasha Nolosha ee Jira		Daaweynta Nafaqodarrida Ba'an 6 -59Bilood	
Meesha	Tirada-guud ee la gaaray Bishii 4aad 2012 iyo ka dib	Meesha	Tirada-guud ee la gaaray Bishii 4aad 2012 iyo ka dib
Muqdisho	550,552	Koonfurta	185,286
Koonfurta	1,808,259	Bartamaha	35,461
Bartamaha	549,310	Waqooybari	19,298
Waqooyiga	496,703	Waqooyigalbeed	8,889
Wadar	3,404,824	Wadar	248,934

⁸ Ogolaansho lagu qyabinayo abuurka massagada qaar ka mid ah degmooyinka Jubbada Hoose iyo Shabeellada Dexe ayaa waxa diiday maamullada ka jira dhulkaa ka dib markii qaar ka mid ah beeratalaydu ay beereen abuur massago oo kooban oo keyd u ahaa si ay uga faa'iideystaan roobabka
⁹ Abuur quadaar ayaa loo qaybiyay 3,300 oo haween ah (14% oo ka mid ah inta la qorsheeyey in la taageerro) oo ku nool miyiga koonfurta

XAALADDA NAFAQO


Xaaladda nafaqo ee intii u dhaxaysan bilihi 2aad iyo 6aad ee 2012 ayaa u dhow inay la mid ahaato xaaladdii bishii 1aad ee 2012 ee ka jirtay magaalooinka iyo hab-nololeedyada reer miyiga ee dhamaan Soomaaliya, ayadoo xaaladaha gobollada koonfurta iyo bartamaha ay yihiin heerar Daran ilaa kuwo Ba'an, iyo gobollada koonfureed oo ku sugar xaalad Aad-u-Ba'an. Taa ayaa wax aka duwan gobilka Shabeellada Hoose iyo xoolo-dhaqtarada Shabeellada Dhexe oo la filayo inay xaaladhooda nafaqo ay soo roonaat heer xaalad Ba'an ah taasoo o ay u sabab tahay natiijooyin wanaagsan oo dhanka sugnaanta cuntada oo la saadaaliyay xilliga Guga 2012. Taasi waxa dheer in dadka dega webiga Shabeellada Hoose ay haystaan kayd cunto oo gaaraya illaa iyo bisha 7aad ee 2012. In kastoo heer nafaqo-darro Aad-u-Ba'an ay ka jirtay badi gobollada koonfureed tan iyo bishii 1aad ee 2012, waxoogaa horumar ah ayaa la filayaa ka dib fursad u helidda cunno, Gurmad bani'aadminimo, iyo heerka faafsanaanta cudurrada oo weli ah kuwo aan ka duwanayn heer xilliyeedyada caadiga ah. Dhanka dadka barakacayaasha waddanka ku barakacay ee dhamaan dalka, xaaladaha nafaqo ayaa la qiyasayaa inay sii ahaan doonaan heerarka Ba'an-Aad-u-Ba'an marka laga reebo barakacayaasha ku sugar Hargeysa, kuwaasoo ku sugar xaalad Daran oo soo taagnayd muddo.

Sahammo nafaqo oo laga fuliyay dhamaan dalka bishii 5aad ayadoo la isticmaalayo habka SMART ayaa muujinya xaalado Ba'an-Aad-u-Ba'an oo ka dhex jira barakacayaasha oo idil, marka laga reebo kuwa ku dhaqan magaalada Hargeysa kuwaasoo ku sugnaa xaalad Daran oo soo taagnayd in muddo ah, ayadoo heerka Nafaqo-Darrida Guud (NDG, WHZ<-2 ama barar) ay gaaraysay boqolkiba 12.0 (9.2-15.5). Tani ayaa loo aanaynayaa dakhliga ka yimaada mushaar-maalmeedyada iyo Gurmadka bani'aadminimo oo kordhay. Barakacayaasha ku nool Doolow ee gobolka Gedo, kuwaasoo heerka NDG-goodu uu yahay boqolkiba 25.9 marka loo eego daraasad baahsan oo laga sameeyey, iyo barakacayaasha Dhuusamareeb ee gobollada Dhexe, kuwaasoo xogta hordhaca ee laga helay ay tilmaamayso heer NDG gaaraya 22.0 boqolkiba (19.6%, Pr=90%) ayaa weli ah nafaqo darro heer Aad-u-Ba'an ah taasoo o ay ugu wacan tahay dhibaatooyin la xiriira cunno helidda iyo gargaarka bani'aadminimo oo aad u hooseeya qeybo ka mid ah deegaannada. Waxoogaa horumar ah ayaa ka dhex jira barakacayaasha Boosaaso iyo Gaalkacyo ayadoo xaaladdu ay haatan tahay heer Ba'an taasoo o ka soo roonaatay heer Aad-u-Ba'an bishii 1aad ee 2012 ka dib Gurmadka bani'aadminimo oo si aad ah u kordhay. Isbeddelku ku yimid barakacayaasha Boosaaso ayaa ah mid samaynaya muhiimad oo kala duwaanansho. Hase yeeshi isbeddelka ka dhacay Gaalkacyo ayaan samaynayn wax muhiimad weyn oo kala duwaanansho ah.

Horumar hor leh, oo ka soo baxday daraasadii nafaqo ee la sameeyay bishii 4aad ee 2012, ayaa laga arkay barakacayaasha ku sugar Muqdisho, halkaasoo xaaladda nafaqo ay haatan tahay mid Ba'an, iyo xaaladda dadka reer-magaalka ku dhaqan Muqdisho kuwaasoo ku sugar xaalad nafaqo oo Daran ayagoo ka soo roonaaday heer nafaqo oo Aad-u-Ba'an bishii 1aad ee 2012. Horumarkan ayaa waxa lo aanaynaa helitaanka shaqooyinka aan sugnayn iyo cunnada iyo Gurmadka bani'aadminimo oo kordhay, taasoo o ay ka mid tahay la socodka, i wax ka qabadka iyo maamulidda cudurada.

Natiijooinkii sahammadii bilihi 4aad-5aad ayaa lagu soo kobay xisaabaadka hoos ku qoran

Jaantuska 8: Caalami (WHZ<-2 ama Caga-barar, WHO 2006 GS) iyo Halis (WHZ<-3 ama Caga-barar, WHO 2006 GS) Heerka Nafaqodarrida Ba'an, Bisha 4aad-Bisha 6aad 2012



Shaxda 1aad: Kala shaandhayntii heerka dhimasho ee UNICEF. La soo miinguuriyay bishii 6aad 20-keeda 2012, bogga 139aad http://www.unicef.org/publications/files/UNICEF_EFH_2005.pdf

CMR (tirada dhimashada Guud 10,000 ee qof maalintiba)	Heerka Darnaanta Xaaladda
Ilaa iyo 0.5	Heer caadi ah
0.5 ilaa 0.99	Heer xaddidan
1 ilaa 1.99	Heer aad u daran
2.0 ilaa 4.99	Xaalad gacan ka bax ah
≥5	Musilbo
Ujeeddada Guud ee barnaamijka wax-ka-qabada xaaladaha ba'an ee bani'aadminimo waa inay ahaataa mid lagu gaarayo heerka dhimashada Guud oo ka hooseeya 1 qof 10,000 oo qofba maalintii, iyo heerka dhimashada caruurta ka yar shan-sano oo ka hooseysa in ka yar 2 qof oo ka mid ah 10,000 ee caruur ah maalintiiba sida ugu dhaqso badan.	

¹⁰ MIKGG (Midaynta Ilaalaynta iyo Kormeerka Garkaarka iyo Geedi-socodiisa) waa qorshe hayadaha ka dhexeeya, ooy sameeyeen 2002 bahwadaag ururo iyo kuwa ku hawlan samafalka ooy ka mid yihiin; hanti-bixiyeeyalka, jaangooyeyalka, iyo khabiirrade Gurmadka cudurrada faafa iyo nafaqada, sugnaanta cuntada, nidaamyada hor-digga, iyo aqoonta dadka. Nidaamka MIKGG waa nidaam kormeer oo la casriyeeyay oo ku salaysan labo arrin oo ugu muhiimsan, aasaaska caafimaadka bulshada oo ifinaya halisasanaanta dhibaatada bani'aadminimo: xaaladda nafaqada ee caruurta ka yar shan sano iyo heerka dhimashada bulshada. Ifiyeyaashani ayaa ayaa muhiim ah marka la baarayo baahida kala hormarinta hantida, iyo weliba ilaalaynta baaxadda uu nidaamka gargaarka uu kaga fillaanayo baahida dadka iyo deedna, waxtarka Guud gargaarkii la fidiyay. MIKGG waxaa la soo saaray si loo hormariyo awoodda farsamo ee hayadaha hawlfuliyeyaasha si u u Gutaaan, u falanqeeyaan, u macneeyaan una qoraan warbixinta xogtii ka soo baxday si laga midaysanyahay si loo sugo kalsoonida xogta nafaqada/caafimaadka. Wixii faahfaahin ah, ka bogo <http://www.smartmethodology.org/>

Heerarka dhimashada Guud oo dib loo eegay 90-kii maalmood ee la soo dhaafay ayaa u dhexeyey 0.07 oo ka mid ah barakacayaasha Gaalkacyo iyo 0.49 oo ka mid ah 10,000 oo qofba maalintii ee gobollada waqooyiga, taasoo o muujinaysa heir La-Aqbali-Karo sida laga helay Hannaanka Heerarka kala Dhafan ee UNICEF (Shaxda X). Hase yeeshee, heerarka dadka reer-magaalka iyo barakacayaasha ku nool magaalada Muqdisho ayaa ah 1.2 iyo 1.4 oo ka mid ah 10,000 oo qofba maalintii, siday u kala horreeyaan, taasoo o muujinaysa heir nafaqo darro Daran, tani oo ah xaalad soo roonaatay tan iyo bishii 1aad ee 2012, xilligaasoo xaaladda barakacayashu ay ka sarreysay heerka ba'an ee 2 ka mid ah 10,000 oo qofba maalintii.


Sahamada nafaqo ee lagu eegayo hab-nololeedyada miyiga iyo magaalooinka ayaa ka socda gobollada waqooyiga iyo bartamaha dalka bilaha 6-7aad ee 2012.Warar dheeraad ah ayaa lagu soo bandhigi doonaa Xogta Nafaqada ee FSNAU taasoo o la jadwaliyyat in la sii daayo dhamaadka bisha 6aad ee 2012.

Warbinta Kooban ee Caafimaadka (laga soo dhiraan dhiriyyah Xogta Degdeegga ee Caafimaad ee Soomaaliya, 9-15ka bisha 6aad, 2012)


Intii lagu jiray wiigga 23aad (9-15ka bisha 6aad, 2012), sababaha ugu waaweyn ee sababayay cudurada dhamaan dalka ayaa lagu sheegay cudurka daacuunka oo la tuhmay iyo cudurka duumada oo la xaqiijiyay.Cudurka daacuunka ee la maleeyay ayaa ah midda qura ee ka soo baxday la tashiyada (waraysiyada) laga sameeyay gobollada Dhexe iyo Puntland.Cudurka shigollosis (xundhurta) oo la shakiyay ayaa ah sababta qura ee xannuunnda laga soo sheegay Soomaalilaan taasoo o ku xigta cudurka daacuunka oo la tuhmay halka cudurka duumada ee la xaqiijiyay ay tahay sababta ugu muhiimsan ee xannuunnda ka jira gobollada koonfureed. Inta badan gobollada ayaa welii helaya roobabka Guga.Meelaha ay colaaadha sokeeye ay aad u saameeyeen ayaa ah gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe, iyo goobahay ku hareereysan Muqdisho, oo ka mid tahay afaafka Afgooye taasoo dhalisay barakac joogto ah.Hase ahaatee, hoos u dhac tirada dadka cudurada qaba ayaa la arkay toddobaadan aan ku jirno taasoo la xiriita xaaladda nabadgeleyo oo soo roonaanaysa inta badan dhulka ay coladaantu saameeyeen. Tirada dadka looga shakiyay cudurka shigollosis (xundhurta) ayaa ah mid caadiga ka baxsan oo aan la aqballi karin. Caddaymaha haatan la hayo ayaa muujinaya in astaamaha curuka xundurta, kaasoo ah “dhiig ka muuqanaya saxarada”, ayaan si habboon loo aqoonsan. Halka aysan jirin xog dhimasho la xiriita cudurka xundhurta, tiro in door ah oo tababarro lagu baarayodh cudurka xundhurta ayaa la qaban doonaa ayadoo la kaashanayo Wasaaradda Caamidaadka, kooxaha caafimaad iyo maamullada maxalliga.

Wixii faahfaahin dheeri ah waxaa lagala xiriir karaa deslooveren@nbo.emro.who.int, ama Dr. Kamran Mashhadi, isku-xiraha ba'hda barnaamijiyada caafimaad, mashhadik@nbo.emro.emro.who.int

Khariidda 4: Qiyaasta Xaaladda Nafaqada, Bisha 2aad-Bisha 6aad 2012



Khariidadda 5: Qiyaasta Xaaladda Nafaqada, Bisha 1aad 2012




INTEGRATED FOOD SECURITY ANALYSIS

URBAN


MAGAALOOYINKA

Ilaa bishii 1aad ee sanadkan, xaaladda sugnaanta cunnada ee magaalooyinka ayaa si isa sii taraysa ugu hore maraysay in the badan dalka. Gurmad bani'aadimimo iyo soo-saarka beeraha ee dalka oo dhan xilligii Deyrta 2011/12 ayaa sababay hoos u dhac ballaaran oo ku yimi qiimaha cuntada, taasoo o raad wanaagsan ku yeelatay qiimaha quutul daruuriga xoojisayna awoodda wax iibsi ee dadka ku dhaqan magaalooyinka. Kharashka nolol maalmeed oo looga qiyas qaato karashka Nololmaalmeedka- ugu-Yar (NuY) ayaa siyaabo kala duwan hoos ugu dhacay inta badan dalka (Jaantuska 9). Dhanka gobollada Koonfur, karashka NuY (May '12) ayaa hoos uga dhacay 13-25 boqolkiiba marka loo eego bishii 12aad ee 2011 inta badan gobollada, kharashkaasoo sidoo kale hoos uga dhacay 41-52 boqolkiiba kuwii bishii May 2011 gobollada Baay, Bakol, Shabeeloojinka iyo Banaadir, iyo 33-35 boqolkiiba gobollada Gedo iyo Hiran, iyo 10-14 boqolkiiba gobollada Jubbooyinka. Dhanka gobollada Dhexe, in kastoo hoos u dhaca ilaa bishii 1aad 2012 uu yaraa (una dhigma 5-7%), kharashkan ayaa 24-25 boqolkiiba ka yar kharshkii kal hore. Hase yeeshi kharashka Nu Yee gobollada Waqooyi ee isticmaala Shilinka Soomaalilaan ayaan wax weyn iska beddelin, kaaso tusaya koror celceliskiisu uu yahay 3-8 boqolkiiba bilaha 1aad-5aad ee 2012. Kharashka nolol maalmeed ee gobollada Waqooyiga ee isticmaala Shilinka Soomaaliga ayaa ka ugu sarreeya dalka kaasoo u dhexeeyaa 3,753,000-4,487,000 SoSh (una dhigma USD 158-181). Kharash nolol maalmeedka ugu hooseeya ee dalka ayaa waxa uu ka jiraan gobollada Koonfur, SoSh 17,06,000 ilaa SoSh 2,541,000 (una dhigma USD 76-116) ayadoo gobollada Jubbooyinka iyo Gedo ay ka jiraan kharash nolol maalmeedyada ugu sarreeya koonfurta, SoSh 2,165,000 ilaa SoSh 2,451,000 (USD 96-116).

Jaantuka 9: Qiimaha KhUD ee Gobollada Bisha5aad 2012 oo la barbar dhigay Bisha 12aad 2011 iyo Bisha 5aad 2011



Jaantuska 10: Taxanaha Awoodda Isweydaarsiga ee Gobollada Bisha 5aad 2012 oo la Barbar dhigay Bisha 12aad 2011 iyo Bisha 5aad 2011



Intii u dhaxaysay bilihi 1aad ilaa 5aad ee 2012, heerarka mushaar hawleedyada ee suuqyo badan oo ka jira dalka ayaa ahaa kuwo xasilloon, laakiin kala duwanaansho ayaa laga arkay suuqyo kale. Dhanka gobollada Koonfur, mushaar hawleedyada ayaa in yar kordhay (1-9%) gobollada Shabeeloojinka, Jubbada Dhexe iyo Bakool halka mushaarrada ay degganaayeen gobollada Banaadir iyo Baay. Hase yeeshi, mushaarrada gobollada Hiiraan iyo Gedo ayaa hoos u dhacay 13 boqolkiiba iyo 19 boqolkiiba, sida ay isugu xigaan, ayadoo loo sababaynayo colaadaha sokeeye oo soo noqnoqda iyo degannaanshiyo la'aan jirta, kuwaasoo saameeyey hawlaha ganaci iyo dhaqdhaqyada suuqyda. Mushaar hawleedka ugu sarreeya ayaa laga helay suuqyada gobolka Gedo (SoSh 154,000) uuna ku xigo gobollada Hiraan (SoSh 113,000) iyo Banaadir (SoSh 102,000); arrintani ayaa waxa loo aanaynayaa hawlaha isdhaafsiga ganaci ee xudduudaha (Gedo) iyo xaaladda nabadjelyo ee Muqdisho oo si hagaagtay. Hase ahaatee, qiimaha mushaar hawleedka ayaa ah kuwa ugu hooseeya gobollada Bakol (SoSh 66,000) iyo Jubbada Dhexe (SoSh 67,500), taasoo loo aanaynayo xasilloon la'aanta jirta iyo hawlaha ganaci oo hooseeya. Dhanka gobollada Dhexe, mushaar hawleedyada ayaa ahaa kuwo deggan una dhexeeyaa SoSh 85,000-92,000. Dhanka gobollada Waqooyi ee isticmaala SoSh, qiimaha mushaar hawleedyada ayaa si aad ah sare ugu kacay gobollada Bari (69%) iyo Nugaal (32%) kuwaasoo gaaray SoSh 135,000 iyo SoSh 150,000, siday u kala horreeyan, taasoo o ka dhalatay hoos u dhac tirada dadka shaqo doonka ah ee hawlada dhismaha ka dib tirada dadka hawlahasi ka shaqeeyaa ee u hayaama Muqdisho ay kordhay. Degganaan dhanka kharash hawleedka ah ayaa laga soo sheegay gobolka Sanaag (SoSh 120,000) halka waxoogaa hoos u dhac ah (12%) laga soo sheegay gobolka Sool (SoSh 100,000) ayna sababeen colaado goos goos ah iyo degannashiyo la'aan hakad geliy dhaqdhaqaqyada suuqyada. Dhanka gobollada Waqooyi ee isticmaala Shilinka Soomaalilaan, mushhaar hawleedyada ayaa kordhay xaddi u dhexeeyaa 7-17 boqolkiiba ee goboka Awdal, inta bandanna loo aanaynayo dalabka shaqo ee ka imanaya sharikadaha wax dhisa oo kordha intii dhexeysay bilihi 2aad-4aad.

Qiimaha maciishada ee hoos u dhacayay iyo xasilloonida heerarka mushhaar hawleedyada tan iyo bishii 1aad 2012 ayaa kaabay awoodda wax iibsi ee saboolka ku nool magaaloojinka. Tan ayaa laga arkay kororka xaddiga Isweydaarsiga Badeecoojinka (ToT) ka dhexeeyaa mushaar hawlo-maalmeedka iyo firilaya (massago iyo galley) dalka laga beero ee inta badan gobollada, xaddiga ugu sarreya oo ah 16-24 kg oo firilay ahna lagu arka gobollada Hiiraan, Banaadir, Baay iyo Gedo ee Koonfurta halka kuwa ugu hooseeya (5-6 kg) lagu arkay gobollada Dhexe iyo Waqooyiga isticmaal SoSh (Jaantuska 10). Kala duwanaanshahani ayaa waxa sababay qiiimaha firilaya ee gobollada wax-soo-saarka leh ee ka jira Koonfurta ayadoo soo gellidda cunnada gargaarka ee ka timaadda Gurmadka bani'aadimimo ay korortay. Dhanka gobollada Koonfur, Isweydaarsiga Badeecoo ayaa kordhay heer dhexdhexaad ah oo gaaraya ugu badnaan 10 boqolkiiba, kaasoo laga yaabo inay sababeen qalaanqalka iyo nabadjelyo darrida ka jirta gobolka. Dhanka gobollada Dhexe, xaddiga isku-bedelashada badeeco (hawl maalmeed la dhaafsanayo massagada cas) ayaa muujiyay heer degannaasho ilaa waxoogaa hoos u dhac ah oo ay sababeen

¹¹ Gobollada Sanaag, Sool, Bari, Nugaal iyo Waqooyiga Mudug

¹² Gobollada Awdal, Waqooyi Galbeed, iyo Togdheer

carqalad ku timi dhaqdhaqaqyada ganaci ee ka dhasay colado soo noqnoqda. Marka la eego gobollada Waqooyi, xaddiga badeeco isweydaarsi ayaa kordhay gobollada Bari (33%), Nugaal (50%) iyo Awdal iyo W.Galbeed (25-27%) ayna ugu wakan thay qimaha massagada oo hoos u dhacay iyo mushaar hawleedyada oo kordhay. Heerar degannaashiyi ilaa kuwo hoos u dhac ah ayaa laga soo sheegay gobollada Sanaag iyo Sool, siday u kala horreeyaan. Natijjooyin laga helay daraasad dhowayd oo laga sameeayay Muqdisho (April '12) ayaa muujisay in helitaanka cunnada dadka reer-magaalka iyo barakacayaasha ku dhaqan magaalada ay soo hagaagtay marka la barbar dhigo daraasad taas la mid ahay oo la sameeayay bishii 12aad ee kal hore. Qiimaha maciishadda ee magaalada ayaa hoos u dhacay 20 boqolkiba ayna sababeen qimaha cunnada oo hoos u dhacay ka dib soo gelidda cunnada suuqyada ee ka yimid wax-soo-saarka beeraha, Gurmadka bani'aadminimo iyo cunnada laga soo dhoofiyo dibadaha ee soo korortay. Taa waxa sii dheer, isdhaafsiga ganaci iyo hawlaha suuqyada oo sii kordhaya ayadoo suuqyo hore u xirnaa dib u furmeen, xawaalladuna ay korortay, dib u dhiska magaalada iyo Gurmadka bani'aadminimo ay kaalin wax ku ool ah ka qaateen horumarkan. Natijjadiina, helitaanka shaqo-xirfaddeedyada, xawaaladaha iyo hawlaha ganacsiyada yar yar ee dadka reer magaalka ayaa kordhay. Waxyaabaha ka soo boxay daraasaddan aaya sidoo kale muujinaya in dadka barakacayaasha ee u helay fursado shaqooyinka aan xirfadda ku dhisnayn iyo ganacsiyada yar yar ay kordheen. Natijjadiina, isticmaalka cunnada ee dadka deegaanka ah iyo barakacayaasha ayaa hagaagtay intii u dhexeysay bilihi 12aad 2011 iyo 4aad 2012 in kastoo kororka uu ku weynaa dadka degaanka ah (ka kordhay 66% una kordhay 95%) marka loo eego barakacayaasha (ka kordhay 64% una kordhay 72%). Faahfaahinta falanqaynta isbeddelladan ayaa waxa lagu soo bandhigi doonaa xogta FSNAU iyo bah-wadaagteeda oo soo bixi doonta bisha 6aad ee 2012.

Isbeddelada sugnaanta cunno ee dadka ku dhaqan magaaloooyinka dalka ayaa si aad ah ugu xirnaan doonta xaddiga wax-soo-saarka beereed ee la filanayo Guga 2012 (bisha 8aad), xaddiga Gurmadka bani'aadminimo iyo xaaladaha nabadgelyo. Wax-soo-saarka beeraha ee meelo ka mid ah dalka oo lagu qiyasay inuu ka hoos mari doono heerka celceliska (dhexdhexas) iyo colaadaha oo uu muuqda inay ku fidayaan gobollada koonfurta aaya waxay saamay ku yeelan karan hawlaha iyo isdhaafsiga ganaci iyo qimaha cunnada ayna sababi karayaan barakac hor leh. Hase ahaatee, saamaynahani kor ku xusan ayaa muuqda inay dhantalmi doonan Gurmad bani'aadminimo oo sii socda, waa haddii fursad loo helo in la gaaro goobaha ay ka jiraan nabadgelyo darrida marka loo eego kal hore. FSNAU ayaa la socon doonta arrimahan iyo saamaynta ay ku yeelan karaan xaaladda sugnaanta cunno ee dadka ku dhaqan magaaloooyinka.

Reer Miyiga

Gobollada Koonfurreed


Qiyaas ahaan 900,000 qof ee Koonfurta ayaa ku jira ama sugar xaalad cunto xumi baahsan oo ah heer daran ama Gurmad ka dib xilligii Deyrta 2011/12. Tani waxay muujisay in si wax-ku-oolnima leh ay ugu soo dhaco (47%) heerkii ay joogtay xilligii Gu'ga 2011; koboca xaaladda sugnaanta cuntada ee deegaanada reer miyiga ee gobollada koonfurreed awgeed, taas oo loo aaneynayo ama sababeynayo saameyntii xilligii wanaagsanaa ee Deyrta iyo korodhka wax qabadka gargaarka bani'aadminimo oo dhinacyo badan leh. Saadaasha wax-soo-saarka xilliga Gu'ga waxa la filayaa in uu ka hooseeyo intii caadiga ahayd, taas oo saameyn ku yeelanaysa xaaladda sugnaanta cuntada, gaar ahaan hab-nololeedka beero-xolo dhaqatada.

Dhulka lagu tabcay firileya xilligan ayaa ah kuwo dhexdhexas ad dhammaan hab-nololeedyada, taas oo lagu sababeynayo qaybinta abuurka, bixinta saacado-cagaf, dayactirka kelliyyada iyo waraha iyo waliba ilaalinta qararka webiyada. Ha yeeshi, saameynta roobabka liita oo ay weheliyaan cayaanka wax yeelleyay dalagyada beeraha (Baay, Bakool, Gedo iyo qaybo ka tirsan Jubbada Dhexe, Jubbada Hoose, Hiiraan iyo Shabeellooyinka) waxay yareeyeen dalagyada taabagaley, waxana kaloo ay sababeen in dhawr jeer abuur-naq ah la sameeyo. Saameynta waxyeello waxay ku xooggan tahay inta badan deegaannada caanka ku ah wax-soo-saarka masagada ee Gedo, Bakool, Baay iyo Hiiraan, iyo waliba Jubbada Dhexe (Saakow/Salagle). Ha yeeshi, waxa la saadaalinaya in uu wanaagsanaado wax-soo-saarka masagada ee qaybo ka mid ah Wanlaweyn (Shabeellaha Hoose) iyo Jowhar iyo Balcad (Shabeellaha Dhexe) iyo galleyad ay beeraan hab-nololeedyada jiinka webiyada. Intaa waxa raaca, roobabka Xagaayada la filanayo (bilaha 6aad-8aad) ay yihiin qaar dhexdhexas ah ama ka sarreeya dhexdhexadnimada, taas oo keeni karta wax-soo-saarka firiley ah oo laga helo gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka.



Galley uu Waxyeeleeyay Dhuun Qabad. Buulo Burte, Hiiraan, FSNAU, 6aad, 2012

Jaantuska 11: Taxanaha Awoodda Is-weydaarsiga Badarka iyo Ri'da daabaxa ah ee Heer Gobol



¹³ Tirada quoysaska ee heila xawaaladda ayaa laba jibaarmay (min 12% to 24%) inii u dhexsay Bishii 12aad 2011 iyo Bishii 4aad 2012 (Kormeerkii reer-magaalka iyo barakacayaasha Muqdisho, Bishii 4aad 2012)

¹⁴ Cunto cunist waxaa lagu qiyasaa "Darajada Cunto Cunista" kaasoo ah darajo lagu xisaabo iyado la isticmaalayo inta jeer uu quyska cuno noocyoo kala duwan oo cunto ah 7 maal mood ee ka horreysay kormeerka

Inkasta oo ay qoysaska ladan iyo kuwa dhexdhexaadka ahi haystaan keyd badar ah oo ku filan kaas oo ka soo jeeda wax-soo-saarkii Deyrta 2011/12, keydka badarka ee qoysaska danyarta ahi ayaax waxa uu ku filan yahay illaa bilaha 6aad-7aad, 2012 sida deegaanada aad u soo saara masagada ee Baay, Shabeellooyinka, iyo deegaanka jiinka webiga ee Hiiraan, qaybo ka tirsan hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Shabeellooyinka (Wanlaweyn iyo Balcad) iyo deegaannada Saakow (Jubbada Dhexe). Keydka badarka ee Jilib (Jubbada Dhexe) waxa uu dhammaanaya bisha 6aad, halka keydka badarka ee Jammaame (Jubbada Hoose) uu ku filan yahay illaa bisha 7aad; wax-soo-saarkii la goostay bilihii 3aad-4aad ee 2012 awgeed.

Kheyraadka daaq ayaax hagaagay; waxa kale oo buuxsamey ama qayb ka mid ah waraha waaweyn, waraha dabiiciga ah, iyo waraha iyo berkedaha gaarka loo leeyahay. Hase yeeshoo, hayaan xoolaad oo ka imanaya deegaannada roob yarida leh kuna jiheysan Shabeellaha Hoose iyo Jubbooyinka ayaax la soo sheegay. Waxa la filayaa in xaaladda daaqu uu hagaago gaar ahaan deexda Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka xaaladda jidh ahaaneed ee meesiyada kala duwan ee xoolaha waxa ku sugar yihiin heer dhexdhexaad ah ama ka fiican (halbeega PET 3-4). Waxa la filayaa in lo'da ku sugar Koonfurta dhasho xilliga Xagaaga, halka uu geelu ka dhali doono Deyrta soo socota. Tani waxay hagaajin doontaa helitaanka iyo oolitaanka caanaha ee gobolladaas, halka ay hadda ka jirto caano yari taas oo loo aaneynayo heerka dhalmada lo'da iyo geela oo yaraa xilliyadii Deyrtii iyo Jilaalkii la soo dhaafay. Korodhka tirada ariga ayaax ka jira inta badan hab-nololeedyada Koonfurta laga soo bilaabo Jilaalkii la soo dhaafay ama tegay. Sidoo kale, waxa la filayaa inay kordhaan tirada lo'da iyo geela heer qoys inta u dhxeaysa xilliyada Xagaaga 2012 iyo Deyrta 2012/13.

Waxa hoos-u-dhacay qiimaha firileyda laga soo bilaabo bishii 1aad, halka la dareemay kor-u-kac yar qiimaha firileyda bishii 4aad gaar ahaan gobollada Shabeellooyinka, Baay iyo Gedo. Liidashada roobabka Gu'ga ee hab-nololeedka beero-xoolo dhaqata waxay saameyn ku yeelatay fursadiihii hawlaha beeraha, taas oo keentay hoos-u-dhac ku yimid heerka mushqaayada ama tacab goosiga maalinlaha ah. Tusaale ahaan, heerka mushqaayada maalintii ee gobolka Baay ee bisha 5aad hoos ayay u dhacday (12%) marka la barbardhigo bishii ka horeysay (4aad) iyo 31 boqolkiiba marka la barbardhigo bishii 12aad, 2011. Haddaba hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Shabeellooyinka, heerka mushqaayadu waxa uu muujiyey kor-u-kac; sidaas si la mid ahna waxa lagu arkey hab-nololeedka jiinka webiga, taas oo loo aaneynayo hawlaha beeraha ee geed midhoodka, khudaarta, iwm, ee ka jira deegaanadaas. Si kastaba ha ahaatee, wax-is-weydaarsiga ama isku-bedelashada tacab goosiga iyo badarka ayaax soo hagaagayay laga soo bilaabo bishii 12aad, 2011; hoos-u-dhaca qiimaha firileyda awgeed. Hadda, awood is-weydaarsiga waxa uu si wax-ku-oolinimo leh uga sarreeyaa marka la barbardhigo heerarkii ugu hooseeyey ee sanad ka hor, gaar ahaan gobolka Baay (23kg masago ah/maalin goosi) iyo Gedo (21kg masago/maalin goosi).

Qiimaha xooluhu way kordheen inta badan suuqyada Koonfurta, taas oo loo aaneynayo baahida jirta awgeed (dhoofka xoolaha, dabaax iyo dhaqasho), cayilka xoolaha iyo yaraanta tirada xoolaha suuqyada la keenayo raadkii abaarihii hore awgeed. Qiimaha ri'yaha daabaxa ah aad ayuu u sareeyaa bisha 5aad, 2012 marka la barbardhigo sannad ka hor (Shabeellooyinka - 31-36%; Jubbooyinka -31-38%; Hiiraan - 84%; Gedo – 82%, Bakool - 130% iyo Baay – 196%). Sidoo kale, qiimaha ri'yaha daabaxa ah wax yar ama dhexdhexaad ah ayuu ka sareeyaa heerkii uu ahaa bishii 12aad, 2011 ee gobollada Shabeellooyinka (9%), Jubbooyinka (9%), Baay (29%), Bakool (23%), Hiiraan (16%) iyo Gedo (21%). Si la mid ah, taxane sanadeedka qiimaha lo'da ayaax lagu argay dhammaan gobollada koonfureed, kuwaas oo hadda muujiyey qiime nagi ama kor-u-kac yar sannadkan. Korodh iyo hagaag awoodda is-weydaarsiga ri'yaha iyo badarka ayaax lagu soo warbixiyey dhammaan gobollada koonfureed. Sidoo kale, awoodda is-weydaarsiga ri'yaha iyo badarka waxa ka muuqda koboc wax-ku-oolinimo leh marka la barbar dhigo sannad ka hor, sida ku cad shaxda hoose ku xusan.

Shaxda 2: Awoodda Is-weydaarsiga Ri'da dabaaxa ah iyo Masggada – Kg/Ri'dii

Gobolka	Bisha 5aad, 2012	Bisha 12aad, 2011	Bisha 5aad, 2011
Masago Guduud			
Baay	468	131	27
Bakool	213	92	24
Gedo	173	89	31
Masago Cad			
Hiiraan	207	109	30
Galley cad			
Shabelle	202	176	53
Jubba	99	60	38



Dalag Masago oo Liita – la Abuurey Horaantii Bishii 5aad. Tuulada Tugar Hoosle, Diinsoor, Baay, FSNAU, 5aad, 2012.

GOBOLLADA BARTAMAH

Deyrtii 2011/12 ka dib, xaaladda sugnaanta cuntada ayaa Guud ahaan soo wanaagsanaatay dhammaan hab-nololeedyada uguna wacnayd waxtarkii wax-ku-oolka ahaa ee xilliga Deyrta. Balse, in lagu qiyaasay 150,000 oo qof oo reer-miyi ah ayaa weli ku sugar wejiyo **Dhibaato iyo Gurmad deg-deg** ah ka dib dhibaatooyinkii kasoo gaaray xilli roobaad xumadii la soo dhaafay. Roobabkii Guga 2012 ayaa si dhexdhexaad ah u hagaajiyay daaqa iyo biyaha, fududeeyayna biyo yaridii ba'nyad iyo biyo dhaamiskii ka socday qaybo ka mid ah Hawdka iyo Cadduunka. Balse, hayaanka dhlulka roob yarida ku dhacday ee xolo-dhaqatada Deexda, meelo ka mid ah Caduunka iyo Digir Tacbatada ay u hayaamayaan Hawdka oo daaqué dhexdhexaad yahay ayaa lagu soo warbixiyay, taasoo laga yaabo inay xaaluf keento. Waxaa lagu soo warbixiyay in naaxsanaanta xoolaha ee dhammaan hab-nololeedyada ay dhexdhexaad tahay (darajada PET 3-4). Laakiin, xoolaha irmaan ee Deexda iyo qaybo ka mid ah Caduunka ayaa la filayaa inay sii weydoobaan. Heerka dhalmada ariga oo u dhexeeyya heer hoose iyo dhexdhexaad iyo dhalmada geela oo hooseysa ayaa lagu arkay dhammaan hab-nololeedyada. Lixda bilood ee socota, ayaa la filayaa dhalmada ariga inay hooseeyso madaamaa rimaya xoolaha uu hadda hooseeyo. Caano yarida geela ayaa lagu soo warbixinayaa uguna wacan tahay heerkii dhalmada geela ee hooseeyay xilligi Deyrta. taasoo keentay in Bishii 5aad 2012 uu sicirka caanaha geela kordho (13%) marka la barbar dhigo Bishii 12aad 2011 iyo 23 boqolkiiwa marka la barbar dhigo Bishii 5aad 2011. Gugan, wax soosaarka digirta ayaa la filayaa inay caadiga ka hoos marto ka dib markii ay dhacday roob la'aan muddo ah, xilli roobaadka oo xumaa cayoyaanna uu cunay. Waxay tani ku keeni doontaa dhibaato qoysaska saboolka ah ee Digir Tacbatada oo horayna u dhamaystay sahaydoodii xilligi Jiilaalka, oo haddana ku nool waxay suuqa kasoo iibsadaan (Lacagtooda iyo amaah) iyo sadaqo oo cunto ah ee loo baahanyahay (Jaantuska 12).

Bishii 5aad 2012, sicirka riyaha dabaaxa ah ayaa kordhay 22-36 boqolkiiwa dhammaan hab-nololeedyada marka la barbar dhigo herarkooda Bishii 12aad 2011. Waxaa middani u sabab ah naaxsanaanta dhexdhexaadka ah ee xoolaha, hoos u dhaca xoolaha imanaya suuqa ooy ugu wacan tahay xoolo yarida saboolka ee dhammaan hab-nololeedyada iyo bahida xoolaha oo korortay ka dib ganacsatada xoolaha oo u urursanaysa bisha Ramadaan (Bisha 7aad-8aad) ee inagu soo aaddan. Bilihi u dhexeeyay 1aad-5aad 2012, bariiska iyo masagada Guduudan ayaa hoos u dhacayay (25% iyo 3%, say isgu xigaan) waxaana ugu wacan sahayda firidda dalka ee Deyrtii iyo tii xilliga ka dib martay ee Koonfurta ee suuqa taalay oo badatay, agabka Dekedda Muqdisho ka soo degaya oo kordhay, xoogsiga Shilinka Somaaliga oo raqiisiyay alaabta soo degeysa iyo wadajirka isbiirsaday ee taageerada gargaarka ee socota. Isbarbar dhigga sanadlaha ah ayaa muujinaya sicirka firida ee Bartamaha oo hoos u dhacay (bariiska-30% iyo masagada Guduudan-33%). Awoodda Isweydaarsiga rida dabaaxa ah iyo bariiska ayaa si weyn u kordhay suuqyada gobollada Bartamaha, muddadii u dhexeysay Bishii 1aad-5aad 2012 uguna wacnayd sicirka rida oo kordhay iyo sicirka bariiska oo dhacay (Jaantuska 12). Balse, dhlulka aan xaaladdooda degganayn sida Dhuusamareeb, kororka Awoodda Isweydaarsiga ayaa marka la eego hooseeyay (30%) uguna wacnayd sahayda suuqa oo khalkhal badan galay. Isbarbar dhigga sanadlaha ah ayaa muujinaya koror 66 boqolkiiwa ah ayna ugu wacan tahay sicirka xoolaha oo ku kordhay dhammaan suuqyada Bartamaha ku yaalla (Shaxda 3).


Shaxda 3: Nidaamka Awwod Isweydaarsiga NAI Rida Dabaaxa iyo Masagada Guduudan - Kg/Neef

Gobolka	Awoodda Is-weydaarsiga Ri'da dabaaxa ah iyo Masagada - Kg/Ri'dii		
	Bishii 5aad 2012	Bisha 12aad 2011	Bisha 5aad 2011
Koonfurta Mudug	115	92	70
Galgaluud	87	63	48
Awoodda Is-weydaarsiga Ri'da dabaaxa ah iyo Bariiska - Kg/Head			
Gobolka	Bishii 5aad 2012	Bisha 12aad 2011	Bisha 5aad 2011
	83	39	33
Galgaluud	53	36	37



Hayaan ka yimid koonfurta Wisil una socda Xero-dhagahley, Odoroska Guga, Bisha 6aad 2012, Hobyo,

Jaantuska 12: Taxanaha Awoodda Isweydaarsiga ee Gobollada (Badarka iyo Riyaha)



GOBOLLADA WAQOYI

Xilligii Deyrta 2011/12 ka dib, 140,000 qof ayaa loo aqoonsaday inay ku suggan yihiin xaalad sugnaan la'aanta cuntada ee waqtiga gaaban, oo kala ah sugnaan la'aanta cuntada ee **B'a'an** iyo tan **Gurmadka Bani'aaddminimo** taasoo hadda tilmaamaysa inay ugu wacan tahay xilgii Gu'gii 2011. Xilli roobaadka Guga 2012, inta badan, Gobollada Waqooyi waxaa loo nisbeyn karaa inuu yahay mid deggen oo dhexdhexaad ah, maxaa yeelay xaaladda daaqsinta iyo biyuhuba waa kordheen oo wanaagsanaadeen, iyadoo uu soo afjarmay biyo dhaamiskii ka socday deegaanadii ay roob yaridu horay u taabatay sida Doooxada Nugaal, baro ka mid ah Oogada Sool iyo Dhulka buuraleyda ee Golis. Hase yeeshiee, dhul xeebeedka loo yaqaan *Guban* ee gobollada Awdal iyo Waqooyi Galbeed waa ka gaar, iyagoo horay u seeggay roobbabkii Xayska ee di'i jiray Bilaha 12aad iyo 2aad, haddana gebi ahaan uusan haleelin roobkii Guga; taasoo o ka dhigaysa saddex xilli oo isxiga oo roob la'aan ah. Wawaase la soo sheegay in xoolo dhaqato badan ay u hayaameen dhinaca rooban ee buuraha Golis ee u dhow.



Daaq iyo riyo naaxsanaantooda dhexdhexaad ah, Hawd, gobolka Tog-dheer, FSNAU, Bisha 5aad 2012

Intaa waxaa dheer, in sidoo kale roobka Guga uu aad u xumaa dhanka Deexda Iskushuban & Caluula, iyo goobo yar oo ku yaalla Soolka, Nugaasha iyo Goliska Gobolka Sanaag. Marka laga reebo hab-nololeedka xeebleyda *Guban*, dhamaan inta kale geediga xooluhu waa mid caadi ah oo ku saleysan danaysi ka dib markii uu wanaagsanaaday xaaladaha dhul daaqsimedka, sida xogta la helay tilmaamayo.

Xaaladda dhaqnaanta xoolaha waxay u dhaxeeyaa dhexdhexaad amaba ka sii fiican inta badan hab-nololeedyada dalka kolka laga reebo hab-nololeedka xeebleyda *Gubanka* kaasoo laga soo sheegay in dhaqnaanta xooluhu uu ka hooseeyo heerkii dhexdhexaadka ahaa, dhalidda riyu ayaa waxaa lagu tilmaamay mid u dhaxeeyaa heerkii qyaasta dhexe iyo kan hoose, halka iduhu yihiin mid u dhaxeeyaa qyaasta dhexe iyo mudda fiican. Dhalmada Geela ayaa billaabatay Bisha 6aad 2012 inta badan hab-nololeedyada dalka, waxaana la filayaa inuu sii socon doono ilaa Bisha 7aad. Manfaca caanaha geela ayaa aad u hooseeyaa iyadoo ay ugu wacan tahay dhalitaankii geela oo aad u yaraa xilligii Deyrta 2011/12. Dhanka kale caanaha riyu waa mid dhexdhexaad ah marka laga reebo goobihii ay riyu ku dhaleen xilligii Jiilaalka. Si kastaba ha haatee wax soo saarka caanaha geela ayaa la filayaa inuu kordho saddexda bilood ee foodda nagu soo haysa (laga bilaabo Bisha 7aad 2012), gaar ahaan hab nololeedyada Hawdka, Cadduunka, Buuraleyda Golis iyo Dooxada Karkaar/Dharoor. Bishii 5aad 2012) sicirka caanaha geela ayaa kordhay inta u dhaxeysa (11-14%), taasina waxay caddaynaysaa in oolitaanka ama helitanka caanaha geela uu yar yahay.


Maadaama uu wanaagsanaatay dhaqnaanta xoolaha isla markaana la *Gudagalay* bisha Ramadaan oo ah goorta suuq geynta xooluhu ay sare u kici jireen, ayaa durba waxaa kor u kacay qiimaha neefka ariga ee dabaaxa ah. Gobollada Waqooyi Galbeed waxaa ku kordhay 29% halka Waqooyi Barina 13% uu ku saa'iday, intii u dhaxaysay Bilaha 1aad ilaa 5aad 2012. Dhanka isbarbar dhigidda sanadaha waxay muujinaysaa koror macquul ah oo gaaraya 13% gaar ahaan Waqooyi Galbeed laakiinse gobollada Waqooyi Bari waxaa ka muuqda koror aan sidaa u buurnayn oo ah 5%. Kororka sicirka ariga dabaaxa ah ayaa lagu nisbeyn karaa rabitaanka sare ee ka jira suuqyada xoolaha ee ku tiirsan/xiriirkana la leh dekedda Berbera.

Dhanka kale, sicirka masaggada *Guduudan/cad* ayaa waxa uu hoos u dhacay 10-15 boqolkiiwa dhamaan suuqyada gobollada Waqooyiga. Sidaa si la mid ah ayaa ka muuqda sicirka bariiska ee Waqooyi Galbeed halka Waqooyi Bari uu ka ladifanaa/xasilloonaa (3%). Hoos u dhaca ku yimidascaarta badarka waxay horseedday inuu wanaagsanaado saamiga isku beddelashada badarka iyo ariga dabaaxa ah sida laga soo minguuriyay gobollda Waqooyiga, kaasoo u dhigma inta u dhaxeysa 67 kilo ilaa 76 kilo bariis/neefkiiba ama 65 kilo ilaa 108 kilo hadhuudh/meseggo neefkiiba, waana qyaasta ay u bahan yihiin qoys reer *Guuraa* ahi muddo hal bil ah. Hase yeeshiee, hab-nololeedka Xeebaha Deexda ee Iskushuban, Bandar Beyla iyo Caluula ayaa awooda wax iibsiiga dadweynaha yahay mid hooseeye (53 kilo / neefkiiba) marka loo eego hab-nololeedyada kale ee ka durugsan xeebaha (Jaantuuska 13aad).


Dhaqdhaqaqa dhaqaalaha ee socday xilliga Guga waxaa ka mid ahaa kalluumeysga iyo manfaca xijiga (baydi iyo beeoyo). Wax soo saarka xijiga waa uu wanaagsanaaday ka dib markii roobab fiican ay ka da'een bariga buuraleyda Golis ee Gobolka Bari laakiinse manfacii laga heli jiray Kaluumeysga ayaa hoos u dhacay. Sababtuna waxay tahay bad xirankii Xagaaga oo ku soo beegmay isla goortii dib loo furay suuq-geyntii kallunka ee Yemen, kaasoo muddo u xannibnaa/xidhnnaa (Bisha 1aad ilaa Bisha 4aad) colaadda sokeeye ee ka jirtay dalka awgeed; waxayna dhabar jab ku noqotay dhaqaalihii laga heli jiray kalluumeysga. Hase yeeshiee xilliga u soo horreeya ee kor u kaca kalluumeysga la filayo ayaa ah Bisha 10aad 2012 ilaa Bisha 2aad 2013.

¹⁵ Waa xilli roobadka kaliya ee hab-nololeedkani helo

Jaantuuska 13: Taxanaha Nidaamka Awoodda Isweydaarsiga gobollada (Badarka iyo Rida)



HAB-NOLOLEEDYADA SOOMAALIYA



FSNAU - Warbixinta Kooban ee Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada - Bisha 6aad, 2012

Dabacaadihii iyo qoraalladii la shaaciay ee u dambeeyay iyo kuwa soo socda

FSNAU Bisha 5aad-Bisha 6aad Xogta Dhamaystiran ee Nafaqada, Bisha 6aad 2012 (Soo-socotaa)

FSNAU Bisha 5aad Xogta Cimilada oo dhamaystiran, Bisha 6aad 2012

FSNAU Bisha 5aad Xogta Suuqa oo Dhamaystiran, Bisha 6aad 2012

FSNAU Xogwarranka Gundhigga ee Reer-magaalka Garoowe, Bisha 5aad 2012

FSNAU Xogwarranka Taxanaha Farsamo ee Deyr 2011/12 ka dib, Xaaladda Nafaqada, Bisha 3aad 2012

FSNAU Xogwarranka Taxanaha Farsamo ee Deyr 2011/12 ka dib Falanqaynta Sugnaanta Cuntada, Bisha 3aad 2012

Ogow: Daabacaadahan iyo qoraalladan sare ku xusan waxaad ka heli kartaa FSNAU shabakaddeeda: www.fsnau.org

Technical and Managerial Support



Funding Agencies



Common Humanitarian Fund
Somalia